

30 DHACDO

IYO SADDEX CASHAR

Dhacdooyinkii ugu Waaweynaa ee Soo Maray Noloshi
Rasuulki (SCW) Dhalasho ilaa Dhimasho iyo
Casharrada Dheemanka ah ee ku Duugan
Dhacdooyinkaas.

Sakariye Haaruuni

30 Dhacdo iyo Saddex Cashar

Dhacdooyinkii ugu Waaweynaa ee Soo Maray Noloshi Rasuulki (SCW) Dhalasho ilaa Dhimasho iyo Casharrada Dheemanka ah ee ku Duugan Dhacdooyinkaas.

Sakariye Haaruuni

Hibayn

Dhiganahan waxa aan u hibaynayaa:

1. Rasuulkeenni Muxammad (SCW) ee sharafta badan lahaa; oo isaga oo jidh ahaan aan innoola joogin uu dhaxalkiisi oo jarribaya aadanaha innala joogo habeen iyo dharaar. Rasuulki Allow naga guddoon waraaqahan iyo xarriiqaha ku yaalla, ee maragga ka ah hilawga iyo jacaylka aanu kuu qabno, ee aanu u jamannay la-kulankaaga.
2. Dhammaan qof kasta oo Soomaali ah ayaan sidoo kale u hibaynayaa; si uu u ogado warka iyo dhacdooyinka ku saabsan suubanihi u silcay ee saxariiray sidi ay dadkiisu u badbaadi lahaayeen, ifkana uu mugdiga diindarrada ee haysta ugu beddeli lahaa nuurka iyo naruurada diinta Islaamka.

Mahadnaq

Waxa mahad oo dhan iska leh Alle, waxa uu inoo suurtagaliyey in si nabad ah uu innoogu dhammaado dhiganahani, waxa kale oo uu inoo suuregaliyey baahinta buuggan, oo kugu soo gaadhay si dhib yar. Waxa aan sidoo kale u mahadnaqayaa dhammaan walaalihi soo jeediyey in aynu mawduucan wax ka qorno, aniga oo aan ka gayoonayn tixidda magacyadooda, mid kastaba halkiisa ayaa uu ku mahadsanyahay, aynuna ku salaamaynaa, Allena waxa aynu uga baryeynaa in ra'yigoodaa ay bulshadooda gashadeen uu abaalkooda ugu badiyo, idam Alle. Ugu dambayn waxa aan u mahadnaqayaa adigaagan akhriyaya dhiganahan; sababta oo ah laba qodabba waad ku mudantahay in laguu mahadnaqo:

1. In aad go'aansatay ka-midnoqoshada inta aan badnayn ee wax akhrida, iyaga oo dhex mushaaxaya Maktabado dadki lahaa ay qaar badan oo ka mid ahi waa' hore la kulmeen Allihi uumay.
2. In aad danaysay oo aad raadisay mawduucan, go'aanna aad ku gaadhay in aad ka mid noqoto inta mudnaan weyn siisay diintooda, dantooda, iyo duruufta dadkooda.

Hordhac

Dhiganahan aan ugu magacdaray (SODDON DHACDO IYO SADDEX CASHAR), waa dhigane sida korkiisa ku qoran ka hadlaya 30 dhacdo, oo ka mid ah qisooyinka noloshii Rasuulka iyo saxaabadiisi qaar ka mid ah, laga soo bilaabo dhalashadiisi, heer laga gaadhayo dhimashadiisi, innaga oo u qornnay hab isku xig-xiga, oo aan ka boodin heer ka mid ah heerarki uu Nebigu maray, ha noqoto heer nololeed, ama heer baaqitaan iyo dacwadeede.

Sababta aan innoogu dooray dhacdooyinkaasi waxa weeye:

1. In qof kasta oo ifkan ku nooli uu u baahanyahay nafsaddiisana ay ku abuurantahay in uu helo cid uu ku daydo (Role Model), ciddaas oo uu aaminsanyahay in ay ku dhaanto waxa uu kaga dayanayo. Qofka Muslimka ahina cidda ay tahay in uu ku daydo, oo uu cagta cagta u saaraa waa Nebigeenni sharafta badnaa ee Muxammad (SCW), iyo saxaabadiisi nasiibka u helay in ay ardayda u noqdaan macallinkii ugu fiicnaa, ee ifka soo maray. Noloshu maadaama ay dhinacyo badantahay, oo ay leedahay dhinac diineed, dhaqaaleed, siyaasadeed, caafimaad, bulsheed, wax-soosaar, hal allaale halki uu qofku u dhaqaaqo ma soo helayo qof uu kaga daydo oo ka fiican Nebi Muxammad (SCW).

Marka aynu dhacdada taariikheed sheegno, waxa aynu ku xigsiinaynaa saddex qodab, oo dhacdadaas lagala soo baxayo marka la dhuuxo; si aynu u fudaydinno faafitaanka farriinta ay dhacdadu gudbinayso.

Dhacdooyinka iyo dhambaallada

Dhacdada (qisada) iyo ka sheekayteedu waxa ay aadanaha ku leedahay saamayn gaar ah, oo aan hadalka qaybihiisa kale ku samayn. Allena waxa uu Qur'aanka wax badan kaga sheekeeyey umadihi ifka soo maray iyo wixi ay dhiteeyeen, xumaan iyo samaanba; si looga dhinbiil qaato, oo wixi sanna loogaga daydo, wixi xunna looga dayriyo. Alle isaga oo ka warramaya qisooyinku sida ay aadanaha u saameeyaan Qur'aanka kariimka ah waxa uu ku leeyahay: “dhacdooyinka kuwii hore kuwa Caqliga leh waxa ugu sugar wax-ku-qaadasho, ma aha war lagu been abuurto, ee waa mid rumaynaya waxa lagu soo dejiyey Nebi Muxammad (SCW), sidoo kale waxa uu hanuun iyo raxmad u yahay duulkä rumaynaya”.

Sida uu leeyahay Garyaqaan **Dr. Muslim Yuusuf**, qisadu waa Fan ka mid ah Fanniyada, waxa ay leedahay kaalinteeda weyn ee sarraysa, marka loo eego suugaanyahannada caalamiga ah, heer ay garsoorayaasha casriga ah ee suugaantu qisada ku sheegeen (Boqoradda suugaanta tiraabta ah).²

Haweenayda qoraaga ah ee **Shaxaata Muxammad Saqr**, waxa ay buugeeda (CASHARRO IYO CIBROOYIN) ku leedahay: “qisooyinku waxa ay barbaarinta nafta ku leeyihiiin saamayn aad u baaxad weyn, bal u fiirso amarka uu Alle siinayo Nebiga, ee uu ku leeyahay: “Uga sheekee Qisooyinka, waxa ay mudanyihiiin in ay fekeraane.”^{3,4}

Halkas waxa si weyn uga muuqanaya saamaynta xooggan ee ay Qisooyinku ku leeyihiiin nafaha aadanaha; sababtaas ayaa aynu innaguna u doorbidnay in aynu dhiganahan qisooyin ka dhigno.

¹ ۱۱ : يفس

² (2) رجلا التوجيهيا الإلهية للغز المسلم من خلا القص العبي في سوق القصص الخيم الدكتور مسلم اليافس .

³ ۱۶ : الأضا

⁴ صفحه شحة عيو القص صح ووچ ده

Dhacdada 1-aad

Dhalashadii Nebi Muxammad (SCW)

Habeenki uu Nebi Muxammad dhashay waxa dhacay mucjisoojin aan hore u dhicin, dibna aan u dhici doonin. Mucjisoojinka waxa aynu kasoo qaadanaynaa dhawrka la hubo, ee dhigayaasha taariikhdu dhiteeyeen. Wuxuu ay dhiganayaasha Sooyaalku dhigayaan in Nebigu (SCW) marki uu dhulka soo gaadhay uu gacantiisa dhigay, isaga oo madaxiisa u taagaya dhanka samada!⁵

Habeenkani ma ahayn mid yare, waxa sidoo kale dhacay in hooyadi Nebiga ee **Aamina** ay ku riyootay iyada oo uu ka soo baxay iftiin kaahiisa la wada arkay, heer uu nal u noqday oo uu wada iftiimihey qasriyadi dhulka **Shaam**.⁶

⁵ اللّوَّا الْمَكْفُونُ فِي سُوقِ الْبَلْيَةِ الْمَأْمُونُ «دِرَاسَةٌ مُحْكَمةٌ لِلْسُّقْوَةِ النَّبِيَّيَّةِ»

الْفَوْقَا : مُوسِعٌ بْنُ رَاهِدٍ الْعَازِمِي

تَقْرِيرٌ : الدَّكْتُورُ مُحَمَّدُ سَوَادِيُّ قَلْهَ حَيْ النَّجَحِ عَنْدَنَا الْخَمِيسِ

الْمُخْتَصُوصُ الْكَبِيرُ فِي سُوقِ الرَّسُولِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

الْمُطَبَّعُ الْعَزِيزُ مُحَمَّدُ بْنُ إِبْرَاهِيمَ ابْنِ جَمَّاتِ الْكَنَانِ الْحَجَّيِ الْأَصْلُ الدَّمْشِيقِيُّ الْمَوْلَهُ ثُمَّ الْمَصْرِيُّ بْنُ الْوَلِيِّ (الْفَوْقَا : ٦٧٧)

الْمُحْكَمُ : سَلِيْمَانُ بْنُ مُعَاوِيَةَ الْعَانِي

Saddex Cashar

Waxyaabaha aynu dhacdooyinkaas ka qaadanaynaa way badanyihiin, ee waxa aynu ka soo qaadanaynaa saddex ka mid ah:

1- In Nebiyada la soo raacin jiray Mucjisoojin ay adag tahay in ay u dhaceen, lana yimaaddaan cid aan iyaga ahayn; sababtuna waxa ay ahayd in mar haddi ay dadku kala duwanyihiin, oo ay ku jiraan qaar madax adag, la tuso in aanu Nebigaasi ahayn qof dadka la mid ah, ee uu yahay mid inta soo hadhay wax dheer, oo arrimo Alle wato ay la socdaan, uuna yahay qof uu Alle u doortay in uu inta kale farriinta caddaynaysa qaabka ay u noolaanayaan loogu soo dhiibay.

2- In iftiinka ay Nebiga hooyadii ku riyootay ee ifiyey dhulka **Shaam** macnihiisu uu yahay in diinta Islaamku ay saldhiganayso dhulka **shaam**; waayo waxa sugar in aakhiru-samaanka ay **Shaam** noqon doonto dhufays Islaam, sidoo kalena uu ku soo degi dooni Nebi **Ciise (CS)**.

3-In marki uu Alle Nebiga madaxiisa u taagay dhanka samada, uu dadka si dadban u tusayey in uu Alleha dhabta ahi yahay kan jira dhanka samada, ogaalkiisa iyo maqalkiisana kula socda aadanaha oo dhan, ee aanu ahayn Waraabe-utaagyada (Sanamyada) ay dhoob-dhoobeen, ee gacan-ku-rimiska ah.

Dhacdada 2-aad

Nasabki iyo Koritaanki Nebiga (SCW)

Nasabka Nebiga oo ay tahay in aynu baranno, sida aynu keenna u naqaannaana waxa weeye: Muxammad Binu Cabdullaahi Binu Cabdul-mudalib, Binu Haashim Binu Cabdi-manaaf, Binu Qusayyi Binu Kilaab, Binu Murra Binu Kacab, Binu Lu'ayyi Binu Qaalib, Binu Fihr Binu Maalik, Binu Nadr Binu Kinaana, Binu Khusayma Binu Mudrika, Binu Mudar Binu Nisaar, Binu Macad Binu Cadnaan. Halka ay hooyada Nebigu ka tahay: Aamina Bintu Wahb Binu Cabdi-manaaf Binu Suhra, Binu Kilaab Binu Murra. Waxa aad aragtaa in Nebiga iyo hooyadii ay isugu yimaaddaan dhanka abtirsiga awowga shanaad ee **Kilaab Binu Murra**.

Nebiga hooyadii waxa ay naaska jaqsiisay 7 casho, ka dibna waxa ayaamo naas-nuujisay **Suwayba al-Aslamiyya**.⁷ Intaa ka dib waxa Nebiga koriyey **Xaliima as-Sacdiya**, oo uu la joogay ilaa 5 ama 6 sano, ka dibna waxa loo soo celiyey hooyadii, isaga oo 6 sano jir ah ayaana ay Nebiga hooyadii Aamina geeriyootay, waxaana noloshiisa iyo korintiisa la wareegay oo garabka u ritay awowgii **Cabdi-mudalib**, waxaana uu kula dhaqmi jiray dhaqan aad iyo aad u wanaagsan, oo aad baa uu u jeclaa. Marki uu dhintay awowgiina waxa Nebiga koriyey adeerkii **Abuu Daalib**.

Nebiga oo ay da'diisu tahay 8 sano iyo bilo ayaan adeerkii la safray, oo waxa ay qabteen dhulka **Shaam**, halkaas oo lagu arkay astaamihi Nebinimada, laguna taliyey adeerkii in uu dib u celiyo si aan dadka warkiisa kutubti hore ku hayaa u dhibaatayn, iyaga oo ay ka tahay xin iyo xaasidnimo. Marki ay da'diisu gaadhad 15 jir ayaan uu isla **Shaam** la soo qabtay maal ay lahayd **Khadiija Bintu Khuwaylid**, oo ay iyadu u gacangalisay; si uu ganacsi ugu sameeyo, waxaana la socday wiil ay dhashay oo la odhan jiray

⁷ المختصر الكبير في سير الرسل صلى الله عليه وسلم

عبد العزىز بن محمد بن إبراهيم بن جعفر الكتани الحنفي الأصلان الدمشقي المؤلف ثم المصري ع المقدسي (المخطوط : ٥٧٧)

Maysara. Marki ay da'da Nebigu gaadhey **25** jir, waxa uu guursaday **Khadiija Bintu Khuwaylid** oo ay da'deedu tahay **40** jir.⁸

Saddex Cashar

Saddexda cashar ee aynu ka xulannay dhacdooyinka isku xig-xigay, ee ku saabsan koritaanki Nebigu (SCW) waxa weeye:

1-In dadka agoonta ama rajaydaba ah wax badan aynu daryeelno, ma ogin berri waxa uu noqon doono iyo halka uu umadda ka geli doono, ee yaynaan wajiga iska xumayn, xag Alle iyo xag aadameba. Wuxaana uu Nebigu sheegay in qofka koriya ee daryeela qof agoon ah uu isaga jannada kula saaxiibayo. Innaguna haddii aynu Soomaali nahay aad iyo aad ayey innoogu dayacanyihiin carruurta guryaheenna joogta ee aynu haysanno, cid qaraabada ahna ay dhashay.

Waxa nala daris ahayd gabadh dhashay ubad badan, inta ay koreen ayaa qaarkood la guursaday oo ay carruuro dhaleen. Wuxa xaafadda la joogta inan yar oo ay gabadha guriga leh walaasheed ka dhimatay. Nolosha ay ilmahaa yari ku nooshahay Alle ayun baa og, oo korkeeda ayaa aanu ka aragnay jidh-dilka baaxadda weyn ee ay la nooshahay, jeex-jeexa wajigeeda ku yaalla qof arkay un baa sawiri kara, hawsha dabadda laga soo qabanayo iyada ayaa qabata, si kasta oo ay uga tan iyo taagba weyntahay, afkeedu ma yaqaanno dhoollacadaynta; waayo in la raro oo sida agab koronto ku shaqaynaya loogu shaqeeyo mooyee, wax ay ku dhoollacadaysaba may arag, waxbarashana haba sheegin. Tani waxba kama aha boqollaalka carruurta ama dhalinta ah, ee dhiigga lagaga jaqo guryaha hoostooda, cid codkooda dibadda u soo saartana waayey.

⁸ تَوَلَّ فِي سَيْقَ الرَّسُولِ الْكَرِيمِ مُحَمَّدٌ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

Waxa se farxad ah in dulmiga aanu Alle abaakiisa inta badan Aakhiraba la sugin, ee uu daalimka ifka ku tuso hoogga xumaanti uu falay.

2- In qofku marka uu yaryahay loo saaro **miyiga** oo laga helayo laba qodab oo kala ah: 1-in uu afka ku soo barto 2-in uu jidh ahaan ku soo adkaado.

3- Amiyadda ay leedahay amaanadu; waayo guurki Nebigu uu Khadiija guursaday waxa codsigu uu ka yimi iyada, oo aad ula dhacday habki amaanada lahayd ee uu Nebigu (SCW) u maamulay maalki ay u dhiibatay, masuulkana uga dhigtay. Nin aanu asxaabnahay oo shirkad __ka mid ah kuwa agabka gawaadhida iibiya__ masuuliyiinteeda ka mid ah ayaa mar ii sheekeeyey. Waxa uu yidhi: “dhalinyartiina waxa ay ka cabanayaan shaqo la’aan, annaguna waxa aanu ka cabanaynaa shaqaale la’aan”! waxa aan ku idhi: “sidee”, waxa uu yidhi: “waxa aanu doonaynaa dad aanu ku aaminno xoolaha umadda, ee aanu gacanta ku haynno, iyaguna aragtidi amaanadana malaha, xaqiiqada marka loo dhaadhacana kama soo baxaan xoolaha loo igamaday in ay ilaaliyaan.”

Dhacdada 3-aad

Sumcaddi Rasuulka (SCW)

Dadki uu ku dhex noolaa Nebigu waxa ugu dhex faafay sumcad wanaagsan, oo dhammaan dadku yar iyo weyn ay marag ka ahaayeen, heer ay gaadheen in magaciisa iyo amaanada ay isku ladhaan, iyaga oo u bixiyey: **Muxammad-amiin**. Waxa dhacay dhacdooyin la is-mariwaayey, ilaa uu kala fardaamiyey Nebigu, isaga oo aan wali Waxyigu ku soo degin. Dhacdooyinkaas waxa ugu tun weynaa dhisidda **Kacbada**, oo marki la marayey dhagaxa madow la isku maan-dhaafay cidda meeshiisi dhigaysa. Xaaladdu waa ay adkaatay oo seefaha ayaa la isula baxay, ilaa la gaadhad fikrad lagu wada qancay, oo ahayd in cidda ugu horraysa ee soo gasha uu noqdo qofka garta qaadaya, sidaas ayaana dhamaan reerihi is hayey ay ku wada qanceen.

Wax la sugaba nasiib wanaag waxa iriddi ay indhuu wada eegayeen ka soo galay Nebi Muxammad oo ay da'diisu markaas ahayd **30 jir**, waxaana uu murugti iyo meel-looma-dhaafaanki taagnaa ku maareeyey aragti toolmoon oo uu yidhi: “dhagaxa ku rida go'an, dhammaan qolyaha isku haystaana dacallada ha qabtaan” sidi ayaana lagu dhammeeyey dhibkii taagnaa. Waa kan qoraa **C/baasid Khaliil**, oo ka mid ah dadka wax ka qoray sooyaalki Rasuulka, oo leh: “marki uu Nebigu gaadhad **35 jir** waxa uu ka qayb qaataay dhismihi Kacbada, Qurayshna waxa ay raalli uga noqotay gartiisi, marki uu gaadhad **40 jirnna** Alle ayaa u waxyooday, oo u diray aadameha oo dhan.”⁹

⁹ غافر السلو في سير الرسول

عبد البطل بن طلحة شيخ الملطي ثم القاهري بن المقى (المخوا : ٥٩٠)

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

- 1- In dadku ay innagula dhaqmayaan kolba wixi aynu tusno, ee aynu samaynno had iyo goor marka aynu iyaga la dhaqmayno ee aynu dhex joogno, waxaasi ha xumaado ama ha samaadee.
- 2- Xikmadda ku jirta sumcaddi wanaagsanayd ee uu rasuulku lahaa, iyo qaabki wanaagsanaa ee uu u dhaqmayey marka laga yimaaddo shakhsiyaddiisi wanaagsanayd, waxa jiray arrin kale oo ah in maadaama uu noqon doono Rasuul Alle, oo waxa uu Alle dadka la rabo isagaa loogu soo marin doono aanu yeelan sooyaal aan fiicnayn, ee noloshiisa oo dhami ay noqoto mid ceeb-ka-saliim ah.
- 3- In da'da **40** jirku ay tahay da'da ay awoodda jidheed iyo ta maskaxeed oo qofku dhammastirmaan, waana da'da uu Alle Rasuullada ugu waxyoон jiray.

Dhacdada 4-aad

Diristii Nebiga (SCW)

Marki uu Alle doonay in uu soo diro Nebiga (SCW), waxa uu jeclaysiiyey kali-noqoshada, oo waxa uu Nebigu ahay mid taga oo ku cibaadaysta hogga magaciisa la dhaho (**Xiraa'**). Isaga oo hoggaas ku cibaadaysanaya, Ramadaanna ay tahay ayaa uu Malaggi Waxyiga ee **Jibriil** u yimi, waxaanu ku yidh: “akhri”, Nebiguna (SCW) waxa uu ugu jawaabay: “ma ihi mid wax akhriya”, saddex jeer marki ay waydiintan iyo warcelintan isku celiyeen, ayuu Malaggi **Jibriil** ku akhriyey shanta aayadood ee ugu horreeya Suuradda **al-Calaq**. Nebigu isaga oo gariiriya ayuu ku soo noqday Khadiija, waxaana uu ku yidhi: “waxa aan u baqay naftayda”, halka ay Khadiija ka dejisay ee ay ku tiri: “Alle kuma hoojinayo”, waxaana ay sheegtay dhaqanno dhawr ah oo uu Nebigu ku ammaananyahay, sida: xidhiihinta qaraabada, u-dulqaadashada waxyaabaha ad-adag, oo ay ka wadday waxyaabahaasi waa kuwo Alle agtiisa kaaga shafeecaya in aan Alle ku hoojin.

Muddo ayaanu Nebigu arag Waxyigi, waanu u xiisay oo waxa uu ku noq-noqon jiray buurti uu ku yaallay hoggi (**Xiraa'**). Marki dambe isaga oo meel maraya ayaa dhanka samada looga dhawaaqay, marki uu dhankeedi eegayna waaba Malaggi hogga ugu yimi oo Kursi ku fadhiya. Malaggi Nebiga (SCW) waa uu sugay, waxaanu ugu bishaareeyey in uu Rasuul yahay, oo mid umadda loo diray uu yahay. Markaas ayaa uu Nebigu argagaxay, oo inta uu ku soo laabtay guriga iyo Khadiija yiri: “I deda”. Wuxaana ku soo degay Suuradda Muddasir, oo uu Alle ku amrayo in uu kaco, dadka uu u digo, Rabbigiina uu weyneeyo.

Markan waxa Nebiga (SCW) u bilaabantay jawi nololeed oo ka gaddisan gabii ahaanba kii hore, oo waxa amar lagu

siiyey in uu dadkan u sheego in waxa ay caabudayaan uu yahay samays aan saamayn lahayn, waxna aan tarayn goor dhaw iyo mid dheertoona. Baaqiisu waxa uu ku wajahanyahay lab iyo dheddig, carruur iyo cirroole, waxaana nasiib u yeeshay kuwi ugu hor islaamay Abuu Bakar, oo magaciisa la odhan jiray: **Cabdullaahi Binu Cusmaan**, isla Abuu Bakar sababtiisana waxa ku soo islaamay saxaabo badan, sida: **Cusmaan Binu Cafaan, Dalxa, Sacad Binu Abii Waqaas**.¹

0

¹ الفصل في اختصار سيد المرسلين عليه السلام

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka xulannay waxa weeye:

1- Saamaynta weyn ee uu leeyahay Akhrisku, oo Nebiga Aayadda ugu horraysay ee lagoo dejijo waxa ay lahayd mid umaddan amraysa in ay wax akhriyaan, Culimadu waxa ay is waydiyaan: maxaa Nebiga (SCW) amarka akhriska loogu gaaryeelay, oo wax kale loo amri waayey? Waxa la ogaaday in cibaadada Akhrkisku ay tahay tan ugu badan marka aynu cibaadaysanayno, haddaynu salaad ku jirno, haddaynu xajaynno, haddaynu qur'aan akhriyeyno, haddii aynu dikriyeyno, waxa ugu badan ee ku jiraa waa **AKHRIS**.

Mar kasta oo ay umaddan Islaamka ahi qaadato amarkaas ahaa bilawgi Waxyiga ee Akhriskana waxaa ay noqonaysaa mid ifkan ku nool karaamo, milge iyo maamuus, waxaana ay soo ceshanaysaa sharafti ay ku lahayd ifkan, ee iyaga looga dambayn jiray habka wax kasta, yar iyo weyn. Akhrisku ma aha wax la iska baryayo, ee waa udub-dhexaadka guusha, horumarka iyo hannanka dawladnimo ee san. Akhrisku ma waxa ay tahay in aynu dhahno: “hebal/heblaayo ayaa ku wacan anna kuma wacni, oo ma ihi dadka xiiseeya akhriska iyo helidda buugaagta”, ee waa arrin mudan in aynu dhammaanteen wax akhrinno, innaga oo akhriyeyna wax kasta oo innaga iyo umaddeenaba anfacaya, oo ka qayb noqonaya badbaadinta iyo badhitaaridda bulshadeenna Islaamka siiba Soomaalida, ee la kacaakufaysa dhibaatooyin aan tiro lahayn, oo dhan walba ah.

2. Saamaynta ay leeyihiin lammaanaha iyo in uu qofku helo qof ay aad isugu dhawyihiiin, oo uu la wadaago isbed-bedellada nolosha, ee farxad iyo faquuq murugeedba leh, oo haddii ay farxad tahayna innala farxa, haddii ay faquuq murugo wata tahayna innaga yareeya murugada. Bal u

fiirso sida quruxda badan ee ay u dejisay Khadiija Nebiga (SCW), ee ay u sheegtay in aanu Alle hoojinayn.

3. Marki uu Alle amray malagga Waxyiga ee Jibriil in uu Nebiga ku soo dejiyo muu amrin in uu ku bilaabo hal mar, ee inta uu ciijiyeey, oo ciijiyeey, oo haddana ciijiyeey ayuu saddexdaas jeer ka dib u bilaabay Waxyigi uu Alle amray in uu ku soo dejiyo. Taasi waxa ay caddayn toos ah u tahay in Waxyigu aanu ahayn sahal, ee uu leeyahay culayskiisa.

Dhacdada 5-aad

Bilawgii baaqa iyo Dacwadda

Hormadi ugu horraysay ee islaamtay, aynuna soo sheegnay waxa ku xigay hormo kale oo fadilan, sida: Abuu Cubayda, Saciid Binu Sayd, Khabbaab Binu Arat, Cabdullaahi Binu Mascuud, Asmaa, Caa'isha. Qoladaasna waxa ku xigay raggi Quraysh ugu sitay sida: Jacfar Binu Daalib iyo haweenaydiisi Asmaa Bintu Cumays, Arqam Binu Abii Arqam, Cusmaan Binu Madcuun, Cammaar Binu Yaasir, Suhayb Binu Sinaan. Sidoo kale kuwii horraanti dacwadda Nebiga islaamay waxa ka mid ahaa: Bilaal Binu Rabaax, Cumar Binu Cabsa, Yaasir, Sumayya, Miqdaad Binu Aswad. Dhammaantoodna waxa dadkaas dacwadda lagu gaadhsiiyey hab qarsoodi ah.

Halkan ayaa waxa ku soo afmeermay xilligi uu Nebigu baaqa dacwadeed ku waday habka qarsoodiga ah, waxaana la gaadhay xilligi uu Nebigu codkiisa kor u qaadi lahaa, iyada oo Alle amarka uu siiyey faray in uu ka bilaabo qaraabadiisa, waana uu ka bilaabay Rasuulku, oo inta uu hal meel isugu keenay ayaa uu ku addomay xaqii Alle faray. Hawshu ma aha sidi hore, oo mar haddii war aan hore loo haynin kor loo qaaday oo dadki la dhex keenay, waxa Nebiga (SCW) ku soo jeesanaya dhibaatooyin badan, Nebiguna guntiga ayaa uu dhiisha isaga dhigay, oo waxa uu meel iska dhigay hurdo iyo nasasho wixi la odhan jiray.

Waxa uu Nebigu bilaabay in uu waddooyinka maro, isaga oo ku baaqaya oo leh: “waar dadow rumeeya Alle, aad badbaaddaane”, waxa uu beegsaday raggi Quraysh ugu madaxa adkaa, heer ay aad iyo aad u dhiveen isaga iyo asxaabtiisaba.¹

1

¹ الأغصان الندية في الخلاصة البهية بقية أحقا السير النبوية في أسماء محمد بن ط

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. In qofka doona in uu umaddan hago oo hagaajiyo ay la kulmayaan dhibaatooyin tiro badan, ayna tahay in uu dulqaato.
2. In qofku marka uu shaqo qabanayo uu ka duulo awoodda uu u leeyahay, isaga oo kolba kor ugu sii kacaya oo u sii dhawaanaya qaadista dhabbada gaynaysa ujeedkiisa.
3. In qofku uu wixi uu kari karayo ka shaqeeyo, oo uu aamino in uu keligii wax badan qaban karo, haddii aad eegto saxaabandan waxa aad arkaysaa hal nin oo tiro badan sabab u noqday in ay tiro badani soo islaamto.

Dhacdada 6-aad

Jidh-dilkii Bilaal (RC)

Si guud iyada oo la dhibayey Nebiga iyo saxaabadiisa, ayaa haddana kuwa loogu dhibka badnaa waxa ka mid ahaa Saxaabigi la odhan jiray **Bilaal Binu Rabaax (RC)**, oo marka laga sheekeeyo sidi loo galay ay adkaanayso in uu qofka maqlaya ama akhriyayaa ceshado ilinta ka tibiq leh ishiisa, iyo murugta buuxisay maankiisa, haddii aanu ku dhitaysnayn dhiganayaasha sooyaalka iyo axaadiistana aanay dad badan rumaysteen.

Marka ay qorraxdu kululaato ayaa meel tammuux/bacaad ah la keeni jiray, beerka ayaa loo jiifin jiray, sibitoor ama shaabuugna waa loo qori jiray oo jidhkiisa ayaa lagu jar-jari jiray, dhagax weynna dusha ayaa laga saari jiray, markaas baa la odhan jiray: “dheh Laata iyo Cusa¹, oo ka gaalow Muxammad”, markaas ayaa isaga aanu afkiisa ka soo baxayn eray kale oo aan ka ahayn: “axad, axad, axad”, oo macnaheedu yahay (Alle waa keli, Alle waa keli, Alle waa keli).

¹ - Waa qaar ka mid ah magacyada Sanamyadi ay caabudi jireen Carabtu.

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. Sida ay kuwa aan xaqa ku taagnayn uga xumaadaan, u nacaan, u ciqaabaan kuwa xaqa ku taagan, ee aanay marnaba ugu adkaysanayn, ee aanay u doorbidin doodda iyo in ay qofka ka ra'yiga duwan la doodaan oo ay qanciyaan, haddii kalana ay iyagu ku qancaan waxa uu ku doodayo, ee keliya waxa ay yaqaannaan dilka iyo duudsiinta.
2. Qofka marka uu Islaamka iyo Iimaanku qalbigiisa dego sida aanu u dareemayn xanuun kasta oo loogu gaysto in uu ka tago jidka hanuunka.
3. Qofka marka lagu dilo, ee lagu dhibo waxa uu aaminsanyahay waxaa uu ka qaadayaa jacayl uu u qabo waxaas lagu dilayo. Waa run oo waa aadame leh dareemayaal shaqaynaya, haddana daremayaashiisa waxa xukumaya qaab fekerkiisa, oo haddii uu ogyahay in waxan lagu xanuujinayaa uu dantiisa yahay, badbaadadiisuna ku xidhantahay waa uu u adkaysanayaa xanuun kasta oo jidhkiisa la damqo bahdil kasta oo nafsaddiisa loo gaysto. Ma qof loo sharraxay kulaylka Naarta iyo hanfigeeda ayaa kulaylka yar ee dhangadda kaga tagaya xaqi uu aaminsanaa, oo ku doorsanaya kaas Naarta ee abadiga ah.

Dhacdada 7-aad

Qaxii Saxaabada

Marki Nebiga (SCW) iyo Saxaabadiisa uu ku adkaaday kuna batay dhibki ay gaalada Quraysheed ku hayeen, ayaan uu Nebigu sida ay dhiganayaasha sooyaalku sheegayaan ku yidhi: “maad u baxdaan dhulka Xabashida, waxa jooga boqor aan agtiisa cidna lagu dulmiyine?” Saxaabada way qaateen warkaas Nebiga (SCW), oo waxa ay kolba tiro gaar ahi u dhaqaaqday dhanka dhulka Xabashida, iyaga oo magaaladoodi dhuumasho kaga baxay, Allena uu u sakhiray doomo ay raaceen oo ay si naf-la-caarid ah ugu tageen dhulkaas ninka caddaaladda badani joogo.¹

Marki ay Saxaabada tageen dhulka Xabashida iyo boqorki meeshaas haystay ee **Najaashi**, waxa ay kala kulmeen caddaaladdi uu Nebigu sheegay (SCW), iyo soodhawayn diirran, inkasta oo aanay Carabti Quraysheed marki ay ogaadeen in ay baxeen aanay ka hadhin, ee ay ka soo daba direen laba nin oo boqorka hadyado loogu soo dhiibay, lana soo faray in ay baqorka gaadhsiiyaan farrin ah in Carabti codsanayso in uu u soo celiyo inamadooda yar-yar ee ka habaabay __waa sida ay ku doodeene__. Marki uu Najaashi dooddaas dhegaysatay waxa uu codsaday in loo keeno Saxaabadi soo hijrootay, waana loo keenay. Wuxuu la bilaabay dooddi, waxaana hadalka qabsaday labadi nin ee laga soo dabadiray Saxaabadi ka soo qaxay dilkii iyo duudsiintii gaalada Carbeed, waxaana ay labadaas nin doodoodi ku bilaabeen in ay nimankani yihii rag ku gacansaydhay wixi ay aaminsanaayeen dadkoodi, adigana __boqorkii__ aan diintaada soo galin.

Waxa hadalki la wareegay Saxaabada, oo Afhayeen ka dhigtay **Jacfar Binu Abii Daab**, waxaana hadalladiisi ka mid ahaa: “Boqorow, waxa aanu ahayn duul/dad ku nool Jaahiliyad,

الكتاب : السوق النبوية ١

3

المصادر : موقع طريق الإسلام

oo caabuda Sanamyada, cuna bakhtiga, sameeya xumaanta, jara qaraabada, xumeeya jaarka, kaayaga awoodda badanna waxa uu ku tiig-tiigsan jiray ka taagta daran. Sidaas baanu ahayn ilaa uu Alle noo soo diray Rasuul aanu garanayno nasabkiisa, amaanadiisa iyo dhawrsoonidiisa. Waxa uu noogu yeedhay in aanu Alle keli ah caabudno, oo wixi annaga iyo aabbayaashay aanu caabudi jirnay ee sanamyo ahaa aanu iska dayno, waxaana uu na amray in aanu runta sheegno, amaanada aanu ilaalinno, in aanu qaraabada xidhiidhinno, in aanu daynno xumaanta iyo dhiigga aanu daadinayno, in aanu daynno hadalka xun, in aanu hagaajinno jaarka, in aannaan xoolaha agoonta cunin, in aanu Alle keliglii caabudno, Alle kalena aanan la caabudin. Waxa uu na faray Salaad, Soon iyo Sako. Markaas ayaanu annaguna rumaynnay oo aanu raacnay, oo wixi uu xaaraantimeeyeyyna aanu xaaraan u aqoonsannay, wixi uu xalaaleeyeyyna aanu xalaal u aqoonsannay, ka dibna waxa nala colaytamay tolkayagi, way na ciqaabeen, na dhibeen, diintayadina way naga fitneeyeen; si ay noogu celiyaan wixi aanu hore u samayn jirnay ee xumaan ahaa. Marki ay na dirqiyeen, na dulmiyeen, oo annaga iyo diintayadi ay nakala dhex galeen, ayaanu u soo baxnay dalkaaga, oo aanu cid kale oo kasta kaa doorannay, waxaana aanu filannay in aan agtaada nalagu dulmiyeyn boqorow”

Marki uu Sakaabigi dhammeyey hadal-jeedintiisi ayuu boqorki waydiiyey waydiin ah: “ma haysaa wax ka mid ah wixi lagu soo dejiyey Rasuulkaas?” Sakaabigina waxa uu yidhi: “haa”, markaas ayuu ka dalbaday in uu u akhriyo, Sakaabigina waxa uu u akhiriyeey Suuradda **Maryam**. Marki uu boqorkii dhegaystay Aayadaha ugu horreeya Suuradda ayuu is hayn kari waayey oo uu ooyey, waxaana uu yidhi: “kan iyo kii lagu soo dejiyey Nebi Ciise (CS) isku meel ayey ka soo baxayaan” wafdigi Quraysh ka socdayna waxa uu ku yidhi: “taga, wallee inaan idin gacan-galinayn kuwan waligiine”. Halkaas ayaanu ku dhammaaday

kulanki ay ku wadeen wafdiga Quraysheed in uu dhagar ugu maleegaan Saxaabada ay dhulkoodi ku nabadgalin waayeen.

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno Dhacdadani waxa weeye:

1. Sida ay ilaalada Alle ula socoto qofka isaga isku xidha, sababta badbaadadana qaata. Alle waxa uu u fududeeyey habki iyo hannaanki ay uga bixi lahaayeen waddankoodi oo lagu dilayo, xaqoodana lagu duudsiinayo. Waxa uu sidoo kale u fududeeyey in nin Kiristaan ahi uu soo dhaweeyo, oo uu ula dhaqmo sidi ugu quruxda badanayd ee marti loola dhaqmi lahaa. Waxa kale oo uu Alle u fududeeyey in ay afkooda iyo eraygooda kaga adkaadaan nimanki ay Quraysh madaxdeedu soo direen, ee wafdiga ahaa.
2. Sida ay dadku u kala wanaagsanyihiin, oo boqorkaa Najaashi waxa uu Saxaabadaas dhulkiisa u soo cararay soo dhaweeeyey isaga oo aan la dad ahayn, la diin ahayn. In kasta oo uu meeshaas ku islaamay, se uu qarsaday oo aanay dadku ogaan.
3. Sida uu Alle addoonkiisa haddii u isaga arrimihiisa u dhiibto uu ugu furayo Irrido iyo albaabbo aanu marnaba filayn, maankiisa aan ku soo dhicin, haddii ay ku soo dhaceenna uu is yiri halkan waxba kaagama soo naasa cadda. Haddii uu addoonku Alle isku xidho, dhaq-dhaqaaqna iyo sababna uu la yimaaddo — haba yaraatee— Alle waxa uu ballan qaaday in uu addoonkaas ka faydayo dhib kasta oo haysata.

Dhacdada 8-aad

Islaamiddii Xamse Binu Cabdul-mudalib (RC)

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Nebiga (SCW) oo buurta **Safa** fadhiya uu **Abuu Jahal** u yimi, oo uu caayey kuna afdheeraaday. Nebiguna isma dhibine waa uu ka aamusay; inlayn qofkaas oo kale ma aha qof hadal lagu khasaareeyee, taasina waxa ay Abu Jahal ku noqotay dhimbiil dab ah, waxaanu soo qaatay dhagax, oo waxa uu madaxa kaga dhuftay Rasuulki Alle, markaas buu dhiiggiisu dhulka u dareeray. Waxa meel aan fogayn kala socday dhacdadan gabadh addoon u ahayd ninkii la odhan jiray **Cabdullaahi Binu Jadcaan**, Xamse oo ogaadhsi ka yimi ayey dhacdadi u sheegtay oo tiri: “haddaad ogaan lahayd waxa ku dhacay inanki uu walaalkaa dhalay ee Muxammad!”. Erayadan marki uu maqlay Xamse (RC) aad iyo aad buu u xanaaqay, waxaana madax martay weedhi ahayd (Inanki walaalkaa dhalay), waxaana uu ahaa dagaalyahan laga haybadaysto.

Wax badan oo maankiisa ku soo dhacay ka dib waxa uu isku sii daayey, oo uu dhankiisi qabtay Abu Jahal, waxaana uu ogaa in aanu qofna ku dhicin in uu hor istaago, marki uu helay waxa uu istaagay hortiisa, waxaana uu ka jaray Qaansadi uu ku soo ugaadhsanayey ee uu sitay, isaga oo kala eegtay isla barti uu Abuu Jahal kaga dhuftay Rasuulka (SCW), dhiigiisina dhulka ayuu u daatay. Haddii uu Abuu Jahal marki uu Nebiga nabarka ku dhufanayey ay meeshu cidla ahayd, Xamse isagu dadka dhexdiisa ayuu kaga dhiijiyeey, iyada oo ay fadeexadi u dhantahay. Intaas oo keliya kumuu joogsan Xamse e waxa uu ugu daray: “waar ma Muxammad baad cayday, aniga oo anigu diintiisa ku jira?” Rag qabiilki Abuu Jahal ahaa baa damcay in ay Xamse la dagaallamaan, balse Abu Jahal baa yiri: “iska

daaya aniga ayaa cay xun caayey inanki uu walaalkii
dhalaye”¹ 4

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

- 1-** Dhibka daran ee loo soo maray sidi ay dadku Allahood u garan lahaayeen, waxa aad soo aragtay Nebiga iyo waxa dhib ku dhacay.
- 2-** Dulqaadka Nebiga (SCW), oo inta dhiiggiisa dhulka loo daadiyey haddana aanu aargoosanayn, qof kasta oo umaddan is dhaha wax u qabana waa la dhibayaa, ama ha ahaato in la caayo ama in jidhkiisaba dhib la gaadhsiiyee, markaa waa in aynu dulqaadanna, oo aynu adkaysanna.
- 3-** Garab istaagga xaqa, qofka wada wanaagga waxa habboon in lagu garab galoo wax kasta oo la karayo, maal, murug, maskax, mabda’ iwm.

¹ المسیح النبویة

4

المؤلّف : طفـة الحـقـيـقـة طـبـه السـرـجـانـي

Dhacdada 9-aad

Soo-islaamiddii Cumar Binu Khadaab (RC)

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu Cumar dibadda u baxay isaga oo seeftiisi ku jeenqaaran. Isaga oo waddada sii haya ayaa waxa ka soo hor baxay nin ka soo jeeda qabiilka reer **Banii Suhra**, waxaanu ku yidhi: “Cumarow waa xaggee?” Cumarna waxa uu ku yidhi: “Muxammad baan soo dilayaa” ninkii ayaa ku yidhi: “oo sidee baad uga nabad galaysaa reer Banii Haashim iyo reer Banii Suhra?” waxa uu ku yidhi: “waar nin diintiisi ka tagay wax ka weyn kuuma arko”, ninki waxa uu ku yidhi: “ma ku tusiyaa wax taas ka layaab badan? Walaashaa iyo seeddigaaba waxa ay ka tageen diintaadi, waxaana ay galeen diinta Muxammad”.

Cumar isaga oo cadhaysan oo caga-juglaynaya ayaa uu qabtay gurigi walaashii, waxa la joogay Saxaabigi qaaliga ahaa ee **Khabbaab Binu Arat**, marki uu arkay in uu Cumar guriga soo galayna meel baa uu ku dhuuntay, waxaana ay akriyayeen Suuradda **Daahaa**. Cumar marki uu soo galay waxa uu ku yidhi: “muxuu ahaa codki hoose ee aan maqlaye?” waxa ay ku dhaheen: “hadal annagu aanu isla hadlaynay buu ahaa” Cumar baa yidhi: “ma diintiinni ayaad ka baxadeen?” waxa markaa hadalki qaatay ninki walaashii qabay oo yidhi: “Cumarow haddii xaqu diintaada diin aan ahayn...” intaasi marki ay afkiisa ka soo baxday ayuu Cumar ku istaagay, ka dibna walaashii ayaa damacday in ay qabato, iyadina dhirbaaxo ayuu dhag iyo dhabanba fujiyey, markaas buu yidh: “keena wixi aad akhiyeyseen” walaashii ayaa ku tiri: “nijaas baad tahay, qur'aankana ma taabtaan kuwo daahir ah mooyee cid kale, ee orod soo waysayso”, waa uu soo waysaystay, ka dibna waxa uu waxoogaa Aayado ah ka akhiyey Suuraddi **Daahaa**, heer uu yidhi: “ii geeya Muxammad”.

Waxa sida aynu soo tilmaamnay guriga ku gabaday Khabbaab Binu Arat, isna marki uu maqlay Cumar oo leh: “ii

geeyaa Muxammad” ayaa uu inta uu soo baxay yidhi: “bishaarayso Cumarow, waxa Alle aqlay ducadi Nebiga ee ahayd: “Allow labada Cumar mid ka mid ah soo hanuuni” Halki ayaana Cumar Nebiga loogu geeyey oo uu ku islaamay.

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waa:

1. Sida uu Alle u gaddiyo qalbiyada dadka, oo uu marar badan qof islaamka col la ahaa muddo yar ka dib uga dhigo ciidankiisa, sida Cumar oo kale (RC).
2. Sida awoodda badan ee uu Qur'aanku u beddelo qalbiyada dadka.
3. Sida qofka kartida leh loogu farxo, oo Nebigu Cumar Binu Khaddaab oo gaal ah ayuu ugu ducaynayey in uu Alle soo hanuuniyo; waayo waxa uu ku ogaa karti, geesinimo, iyo dadnimo haddii uu soo islaamo uu Islaamka wax ugu tarayo.

Dhacdada 10-aad

Sanadkii murugada

Sannadkii 10-aad ee soodiritaanka Nebiga (SCW), ayaa waxa geeriyooyday adeerkiiisi hiil iyo hooba la garab istaagay. Waa adeerkiiisi inta ay odayaashi Quraysheed u yimaaddeen intaas oo jeer kolba fikrad ay ku rabaan in ay ku istaajiyaan Dacwadda Nebiga uu isna diiday oo gaashaanka u daruuray. Marki ay naftu qabatay ayaa uu Nebigu isku dayey in uu Ashahaadda u qabto, waa uu se diiday, isaga oo ka cabsi qaba in la caayo, waxaana uu ku dhintay wixi ay aaminsanaayeen ee waraabe-utaaggaa ahay. Isla sannadkan ay **Khadiija** geeriyooytay, waa Khadiijadi culays iyo cadaadis kasta oo Nebiga ku yimaadda ka kala fudaydin jirtay, waa Khadiijadi uu Nebigu ka dhigan jiray cududda kale ee uu cuskado.

Nebiga oo ay soo gaadhay murugo aan xaddi lahayn, ayaa ay taas ugu darsantay cadaadiska cadawga Quraysheed ay ku hayeen oo isa soo taray, oo marki ay arkeen in uu waayey laba tiir oo uu noloshiisa baacin jiray, meel adagna ugu jiray ayey ku dhiirradeen waxyaabo badan oo aanay marki ay noolaayeen ku dhici jirin.¹

5

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

1. In uu qofku cid kasta oo uu yahay iyo si kasta oo uu aqoon iyo karti uu u leeyahay uu u baahanyahay cid garab iyo gaashaan u noqota, oo Nebi Muxammad isaga oo Nebi Alle soo diray ah ayuu haddana aadame ahay, oo uu dareemayey dhibka, lana qaybsanayey ciddi ugu dhawayd oo ahay adeerkii iyo xaaskiisa. Marki ay labadiba ka

¹ المسیقی النبویة - هو وعبر مصطفیٰ ن حنی السبیع (الخو : ۱۳۸۴)

geeriyoodeennna waa kii sida baaxadda weyn u murugooday, heer sannadkaas loo bixiyey (sannadkii murugada).

2. In ujeedka uu qofku leeyahay uu kolba qaab iyo qorshe ku dayo, oo haddii uu marin iyo meel ugu suurtoobi waayo uu uga wareego hab iyo hannan kale.
3. In waafajintu ay dhanka Alle tahay, oo Nebigu wax badan ayaa uu isku dayey in uu adeerkii Ashahaadda u qabto, balse may suuregalin, markaa waa in qof kasta oo innaga mid ahi uu wax badan ducadiisa ku daro in uu dhaho: “Allow samaha/wanaagga i solonsii/waafaji”.

Dhacdada 11-aad

Socdaalki dhanka Daa'if

Marki ay Qabiilladi Maka deganaa diideen dacwaddii Rasuulka (SCW), ayuu Rasuulku damcay in uu Qabiilka magaalada **Daa'if** daga uu ugu baaqo Islaamka. Waxa ay raggi magaalada gadhwadeenka ka ahaa ku direen Rasuulka ciyaalki iyo haweenki, oo dhulka u taabtay, wixi ay nabar helayeenna ku ganay, heer dhiigga ka yimaadda madaxiisa uu ka dareemo cidhibiisa. Rasuulku marki uu arkay xaalku sida uu yahay ayaa uu iskaga soo laabtay, wax uu socdaba waxa isaga oo daallan, murugsan oo qalbiisa Alle un ogyahay uu soo gaadhay Meesha la yidhaahdo **Qarnul-manaasil**, waxaana halkaas ugu yimi **Malakul Jibriil** iyo malaggi buuraha. Malakul Jibriil ayaa Nebiga ku yidhi: “waxa ila socda Malaggi buuraha, ee maxaad i amraysaa”? Malaggi buuraha ayaa qabsaday hadalki oo yidhi: “waa sidaa uu sheegay, ee maxaad i amraysaa Muxammadow, haddaad ii ogolaato waxa aan iskugu dhufanaya labadaas buurood”, nebigu waxa uu yidhi: “may, kuwa dhabarkooda ku jira, ee ay dhali doonaan ayaan ka rajaynayaa in ay noqdaan kuwo Alle rumaysan, oo aan cid kale la wadaajin.”¹

6

¹ ﴿سُلُوْجُ اللَّهِ عَلَيْهِ وَسَلَامٌ فِي الطَّائِف﴾

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. Sida ay dadku u kala madax adagyihiin, oo kuwaasina waa kuwaas Nebiga dhulka u taabanayey, dhagaxa la dhacayey, ee dhiiggiisi dhulka u daadiyey, halka uu **Abuu Bakarna** marki ugu horraysay ee uu Nebigu afka u kala qaaday uu rumeeeyey, ee aanu u laba-labayn.
2. Naxariisti iyo dulqaadki Nebiga (SCW), waxa aynu ka arkaynnaa nimankii dhiigiisa daadiyey ayaa isaga oo aan dhiiggi wali qallalin oo uu gar-gaar helay haddana in uu ka aar goosto ka doorbiday in iyaga daaye uu u naxayo kuwa aan ifka iman wali, ee ay dhalidoonaan.
3. Sida uu Alle addoonkiisa isaga adeeca ula garab taaganyahay gar-gaarka.

Dhacdada 12-aad

Bilawgii Is-beddelka

Sanadkii 10-aad ee soo-diristii Rasuulka (SCW) ayaa habeen habeennada ka mid ah Alle guuraysiiyey, oo geeyey Masjidul Aqsaa, oo ku yaalla Filasdiin, ka dibna waxa uu Rasuulkeenna sharafta badan Alle u dheelmiyey samooyinka, waxaana uu ku soo waajibiyey shanta Salaadood. Isla habeenki ayuu ku laabtay Maka iyo meeshiisi, dadki ayaanu u sheegay waxa dhacay, mase rumaysan oo waxa ay dhaheen: “meeshi iyada iyo Maka bisha loo kala socon jiray ayaan habeen inta aan tagay kaga soo laabtay ma aha wax aanu aqbali karno, ee wax kale ku hadal”, waxa se rumeyey Abuu Bakar, markaas ayaanu Nebigu u bixiyey naanaysta ah “as-Siddiiq”, oo macnaheedu yahay (kii runsheegga badnaa).

Waxa caado ahayd in sannad kastaba ay Carabtu hal mar Xajka timaaddo iyaga oo u cibaadaysanaya hab khaldan, halkaas ayaana ka mid ahayd meelaha uu nebigu kanskada [fursadda] ugaga faa'idaysan jiray, waxa uu kula kulmay gaabtaas koox ka mid ah Qabiillada Aws iyo **Khasraj**, waxaana uu ugu yeedhay sida caadada u ahayd in ay Alle keligii caabudaan, sanamyadana ay iskaga tagaan; maadaama aanay wax tarayn. Iyaguna mabay ka laba-labayne way qaateen warkii Nebiga (SCW), Madiina oo ay ka yimaaddeen ayaanay ku laabteen iyaga oo Muslimiin ah. Dadki reer Madiinana waxa ay ugu yeedheen in ay qaataan diinta Islaamka, iyaga oo inti uu rasuulku soo baray u sharrxaya. Sannadki kaas ku xigay oo ah sannadki 11aa, ayaa 12 nin oo reer Ansaar ahi ay Nebigi u yimaaddeen ballanna kula galeen in ay garab taaganyihiiin, diintan iyo dacwaddana ay kala shaqaynayaan, Nebiguna (SCW) waxa uu ku daray Saxaabigi layaabka ahaa ee la odhan jiray **Miscab Binu Cumayr**; si uu reer Madiina Qur'aanka ugu akhriyo, diintana uu u baro,

sidaas ayaana reer Madiinu uu Islaamki ugu dhex faafay qaab xawli ah waliba.

Sannadki 13aad ayaa waxa Nebiga si qarsoodi ah ugu yimi koox reer Ansaar ah, oo ay tiradoodu tahay ۷ nin iyo 2 haween ah, waxaana ay Nebiga (SCW) ballan kula galeen in ay la garan taaganyihiin diintaas Islaamka, ayna u ilaalinayaan sida ay haweenkooda iyo ubadkooda u ilaaliyaan, nebiguna waa uu ku farxay warkaas gobannimada leh, waxaana uu magaacay 10 nin oo gadhwadeen noqda, dadkooda mark ay u tagaanna hawsha masuuliyaddeeda iyagu⁷ garabka u rita.

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanynaa waxa weeye:

1. Lexejaclada uu Nebigu umaddiisa ka lahaa sida ay u badnayd, waa ay dhiveen, jidhkiisa ayey ka dhijjiyeen, dhafoorkiisa ayey dhakhreen, haddana waxyaabahaas iyo waxyaabo badan oo ay ku sameeyeen si ay u weeciyaan waddada hanuunkana ay uga hor istaageen kumay keenin Nebiga in uu maalinna inyar oo dadaalkiisi ahi is dhimo, oo uu wax ka hakrado.
2. In qofku natijada waxa uu qabanayo aanu ku xidhin xilli dhaw, ee uu dadaalo haba dheeraato goorta uu natijada helayaaye. Hadda Nebiga (SCW) waxa u yimi dhawr iyo toddobaatan qof oo noqonaya tiradi ugu badnayd ee diinta qaadata muddo 13 sano ah, oo uu ugu baaqayey dhanka Alle, intaas mar keliya muu odhan: “maxaa la ii rumayn la’yahay muddo ayaan baaqayee!”
3. In aanay shaqo kastaa qorshe, maamul iyo maarayn ka maarmin, waxa aynu arkaynnaa 12-ki nine e u yimi Nebiga (SCW) waxa uu ku daray Saxaabigi Miscab Binu Cumayr, isla dhawr iyo toddobaatankii u yimi sannadki 13aadna waxa uu madax ugu dhigay 10 nin oo iyaga ka mid ah. Markaa shaqo kasta oo aynu qabanaynaa waa in ay leedahay madax iyo mijo, haddii kale waxa ay noqonaysaa jaantaa rogan aan wax la sheego oo sharfani ka dhalan, ee iska noqota un dhalanteed la dhoo-dhoobo.

Dacdada 13aad

Hayaanki Madiina

Marki uu batay dhibki ay Qurayshti gaaleed ku haysay Nebiga (SCW) iyo Saxaabada ayaa uu Alle u idmay in ay qaxaan, oo ay meel ay iyaga iyo diintoodu ku nabadgelayso tagaan, waxaana uu Nebigu u sheegay in la qabanayo Madiina, iyaga oo reer Madiinana hawshaas si weyn ugu talo galay, oo Iimaanku nafahooda buuxiyey, diyaargarow fiicanna sameeyey ayaa hormadi ugu horraysay bilaabantay. Wuxuu ugu hor baxay Saxaabigi la odhan jiray Abu Salama Binu Cabdi Asad, ka dibna Caamir Binu Rabiica iyo xaaskiisi.

Nimanki gaaleed marki ay ogaadeen in Saxonkadi ay ka qaxayaan magaaladoodi, ayey tab kasta oo ay ku istaajin karayeen sameeyeen. Wuxaana ka mid ahaa tabahaa iyo talooyinkaas ay is dhaheen way ku joogsanyaan in ninka, xaaskiisa iyo ubadkiisa la kala reebo, si kasta oo ay noqotana Nebigi iyo Saxonkadi waa ay ka qaxeen meeshi dhawr iyo tabanka sano lagu ciqaabayey.¹

8

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. In uu Alle marka uu addoonka wax siinayo, aanu inta badan hal mar irrid iska furine uu sababti shaygaasi addoonka ugu fududaan lahaa solansiiyo.
2. In tallaabada iyo go'aannada waaweyn ee uu Nebigu qaadanayo uu ka sugi jiray dhanka samada, marka ay taahay hawl ka taag weyn wax maanka lagu shiilo.

¹ المسنون النبوة ضعيف وقلع وتحلله أحاديث

المؤلف : عيادة محمد الصلاي

3. Baaxadda ay lahayd dhibki ay Saxaabdu u soo mareen diinta Islaamka iyo dacwaddu in ay ina soo gaadho, heer in ubakoodi iyo ooriyahoodi ay kala cararaan Meesha lagu dilayo loo diiday.

Dhacdada 14aad

Shirqoolkii dhicisoobay

Marki ay gaaladi ogaadeen in Muslimiinti awood ku yeeshen magaalada Madiina, ayey soo qaban-qaabiyeen shir, tashi ka dibna waxa la isugu biyo shubtay in Rasuuka laftiisa qoorta loo dheereeyo oo la dilo. Habka ay is tusiyeen in hawshaas lagu dili karaana waxa uu noqday in qabiil kasta wiil dagaalyahan ah laga soo kaxeeyo, ka dibna ay dhammaantood wada dilaan, reer Cabdi-manaaf oo uu Rasuulku ka dhashayna inlayn waxaas oo qabiil ah lama wada dagaallami karaane ay mag qaataan.

Dhalinyaradi loo xilqaamay in ay Rasuulka dilaan ayaa ku kulmay guriga Nebiga hortiisa goor habeen ah, oo ahaa habeenki uu Nebigu go'aansaday in uu magaaladan iskaga baxo, maadaama uu se ahaa qof maskax badan, oo ku fiican sida qorshayaasha loo dejijo habeenkaas maba seexan gurigiisa, ee booskiisi waxa uu seexiyey **Cali Binu Abii Daalib**, waxaana uu Nebigu (SCW) guriga ka baxay iyada oo aanay cidi arkayn, waxaana uu qabtay guriga Abuu Bakar, oo sii diyaariyey gadiidki ay raaci lahaayan, waxaana uu soo kiraystay nin la odhan jiray Cabdullaahi Binu Urayqid; si uu u tusiyo waddada loo marayo magaalada **Madiina**. Wuxaana ay u kaceen dhanka Yaman; si ay u marin habaabiyaan gaaladi Quraysheed ee islahaa aad dishaan. Wuxa ay tageen hog la dhaho (**Sawr**), waxaana ay ku jireen muddo saddex casho ah, oo marki ay Qurayshi ka raadisay dhanki Madiina, marki ay ka soo waayeenna waxa ay ka raadiyeen dhanki yaman, heer ay soo istaageen afka hoggi ay ku jireen, oo uu Abuu Bakar Nebiga (SCW) ku yidhi: "Rasuulki Allow haddii uu midkood cagijiisa hoostooda eego waa uu ina arkayaa", halka uu Nebigu ugu jawaabay: "Abuu Bakarow maxaad u malaynaysaa laba uu Alle saddex ku yahay? Ha murugoon Alle aaya innala jiree".

Saddex casho kadib Nebiga, Abuu Bakar iyo ninki ay soo kiraysteen ee waddada tusayey waa ay ka soo baxeen hoggi, waxan ay qabteen Madiina, iyaga oo u jihaystay dhanka qoorriga badda Cas. Quraysh waxa ay ninka Nebiga soo qabta abaal ugu ballanqaadday geel tiro badan, oo qofki adduunyo rabaayi uu ku dagmayo. Waxa waddada ay mareen ogaaday nin la odhan jiray **Suraaqa Binu Maalik**, oo daba dhigtay, muddo saddex jeer ahna uu marba faraskiisi limmiday oo uu cagaha dhulka la galay, guntii iyo gabo-gabodiina waxa uu ogaaday cidda uu daba socdaa in aanu ahayn qof caadiya, ee uu yahay qof Alle dirsaday, markaas ayuu ballanqaaday in uu dib isaga noqonayo, Wuxaana uu u tagay Quraysh, oo uu u muujiyey mid waxba soo waayey.¹

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

1. Geesinnimada Cali Binu Abii Daalib, oo seexday firaashki Nebiga oo loo qorsheeyey in caawa la dilo, marki ay u yimaaddeenna u sheegay in aanu Nebigi ahayn, iyaguna ayba indhahooda ku xaqiisadeen ninki ay rabeen in aanu ahayn.
2. Sida baaxadda weyn ee uu Nebigu ugu fiicnaa cilmiga loo yaqaanno (Strategic Planning), oo ah sida qorshayaasha loo dejiyo, adduunkan maantana ku ah cilmi qaaliya. Wuxa aad si weyn uga dheehanaysaa habka uu waddada u beddelay, firaashkiisa u beddelay, iyo sida uu raad kasta o lagu ogaan kari lahaa u baabiiyey.
3. In ay nolosha qof kasta, yar iyo weyn, gaal iyo muslim muhiim ugu tahay waxa **sababta** la dhahaa; waayo ma jiro wax innaga oo iska fadhinna inoo imanaya haddii aynaan innagu raadsan. Oo u rafaadin. Nebi Muxammad oo Rasuul Alle soo diray ah ayaa dhibkaas la mariyey, Alle

¹ المسألة النبوية - حديث عبد الله بن عباس

waa uu awoodi karayey in uu hab yar oo fudud oo iska-soo-dhac ah ku badbaadiyo, hase ahaatee waxa uu Alle ina barayaa in wax sabab la'aan ku yimaaddaa aanay jirin. Si

guud qofka raba in ay umadda Islaamku soo ceshato milgihi iyo maamuuski ay lahayd, si gaar ahna dadkiisu in ay ka baxaan rafaadka waa in uu u dadaalaa, oo u rafaadaa, isaga oo wax kasta oo noloshiisa qaali ku ah ku bixinaya

xoolo iyo xeeladba, haddii kale halkaas un baan taagnaanaynaa, oo dadkeennu ugu silcayaan, wixi ay lahaayeenna dad kale oo dadaalay ugu raaxaysanayan.

Dhacdada 15-aad

Soodhawayntii Rasuulka

Magaaladi Madiina ahayd in muddo ahba waxa ay ku jirtaa diyaargarow diirran, oo ay u samaynayaan Rasuulka Alle (SCW), waxa ay eegayaan jihoooyinka, si gaar ah waxay indhaha la raacayaan jihada **Maka**, waxa taagan dhegahooda oo baadigoobaya sanqadh/jabaq in un marag ka ah in uu Rasuulki soo dhawaaday. Waxa ay soo bixi jireen subixii, ayaamahaasna sida ay dhigaynayaasha sooyaalku dhigayaan waxa ay ahaayeen ayaamo kulul, markaas bay soo laaban jireen marka ay qorraxdu badhtanka samada marayso ee ay ugu kulushahay.

Nebigi iyo Abu Bakar oo soo socda jidka ay qorraxdu holcinayso ayaa waxa ay la kulmeen Subayr Binu Cawaam __ Asma Bintu Abii Bakar ninkeedi__ oo hogaaaminaya ganacsato ka timi dhulka Shaam, una sii jeeda dhanka Maka, waxaana uu Nebiga iyo Abii Bakarba u hadyadeeyey isku-joog caddaan ah, waanay xidheen. Iyada oo uu xilligu yahay duhur uu kulaylka qorraxdu dadki galiyey guryahodi ayey Rasuulki iyo Abuu Bakar ku soo beegmeen, ma jirin dad dibadda tuban oo arkayey, waxa se arkay nin Yahuudi ah, oo ka mid ah Yuhuud meel dhufays ah ku jiray __Yuhuudduna sidooda badan waa dad is qariya, oo dhufaysyo samaysta__, ka dibna ninki inta uu afka furtay ayuu yidhi: “Carabeey waa kan awowgiinni aad sugayseen”, Muslimiinti ayaa soo wada baxay, Nebiguna dhanka midig ayuu u dhaqaaqay, heer uu dul degay reer **Camar Binu Cawf**, ka dibna waa uu fadhiistay isaga oo aamusan, Abuu Bakarna waa uu istaagay. Dadki aan hore u arag Nebiga waxa ay u qaateen ninkan taagan, Abuu Bakar ayaanay salaameen, heer ay Nebiga qorraxdu qabatay, ka

dibna uu Abuu Bakar uga dhigay go'iisi, markaas ayey garteen in uu Rasuulku (SCW) ninka fadhiya yahay.² 0

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. Sida ay Ansaar Nebiga u jeclaayeen, ee ay ugu hiiliyeen, una soo dhaweeyeen xilli kuwi dadka ugu dhawaa ay dhiiggiisa dhulka ku daadinayeen.
2. Saaxiibtinnimada qotoda dheer ee uu Abuu Bakar la soo maray Nebiga (SCW), iyo sida uu garabkiisa u taagnaa.
3. In Nebigu dhar isaga u gaar ah oo ka soocan dadka kale aanu xidhan jirin, ee uu Saxaabadiisaasi waxa ay xidhaan un isna xidhnaa, heer ay Ansaar kala garanwaayeen isaga iyo Abuu Bakar, oo ay Abuu Bakar salaamayeen iyaga oo u haysta in uu Rasuulki Alle yahay. Dr. Salmaan Cawda __oo ka mid ah Culimada uu nidaamka dulmiga ku salaysan ee Sucuudigu jeelalka ku guray, noloshiisa jeelka gudihiisana laga dayriyo, Alle ha ka soo daayee__ ayaa dhigane aad u qiima badan oo uu leeyahay ku yiri: “Cabbaayadda ragga Carabta ah ay xidhaan ee loo yaqaan Bishtida anigu ma xidho; sababtuna waxa weeye in aan ku aqaanno dad goonni ah oo heerkooda nololeed ka yara sarreeyo kan dadka caadiga ah, waa ta kalee waxa aan dhiganayaasha sooyaalka ku hayaa in Rasuulku aanu dhar gaar ah lahayn”² Markaa waxa¹ muhiim ah in aanu qofku dadkiisa iska dhex saarin __ isaga oo maalkiisa u xor wixi bannaan ee uu ku iibsanayo__ ee uu bulshadiisu sida ay u badantahay

² السیق النبویة کل جمله في الأخلاق الصالحة لی عمو محن حم الصویانی

الناشر : مکتب العیکان

الطبعة : الأولى ١٤٢٤ هـ - ٢٠٠٤ م

¹ زنزانة، عادة مدى الحياة

maciishad ahaan ka agdhawaado dhanka aragiisa. Marka la isku soo ururiyo waxa weeye in aanu qofku dharkiisa ku mashquulin, ee maankiisa iyo dhaqankiisa uu ku mashquulo, mar kasta oo magaciisu uu isbeddelo oo mansab yar uu helana aan korkiisu isla beddelin.

Dhacdada 16-aad

Bilawgii Madiina

Nebigu (SCW) waxa uu Madiinadi cusbayd ku bilaabay dhisiddii Masjidka Nebiga, oo laga dhisay halki ay hashiisu fadhiisatay. Inti aanay hasho fadhiisan waxa ay sii martay reero badan, oo kolba uu qofi is dhahaa is taaji ka dibna uu Nebigu (SCW) ku lahaa: “daaya waa mid la amraye”, heer ay fadhiisatay, oo halkii ay fadhisatay laga dhisay masjidka. Inti lagu jiray dhismaha Masjidka waxyaabihi dhacay waxa ka mid ahaa:

1. In Cammaar Binu Yaasir __ oo dhashay Sumaya, oo ahayd qofkii ugu horreeyey ee Alle dartii loo dilo, uuna Abu Jahal si arxamdarro ah waran u galley__ uu la wareegayey caano ay cabbayaan dadka Masjidka dhisaya, oo uu Nebigu ku yidhi: “Cammaarki ina Sumayow waxa ku dilidoonta kooxda xadgudubsan”, sidi uu Nebigu u sheegay ayaanay noqotay oo dhimashadi Nebiga ka dib ayaa la dilay.
2. In **Ascad Binu Suraara (RC)** __oo ka mid ahaa Saxaabadi ugu hor islaamay, masuulkana ka ahaa faafinta baaqa Islaamka ee Ansaar dhexdeeda__ ayaa isaga oo ka mid ahaa dadki Masjidka dhisayey naqasku ku dhagay, halkaas ayaanu ku geeriyyoday.

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdooyinkani waxa weeye:

1. Jacaylka ay Saxaabdu u qabeen Nebiga (SCW), oo uu mid kastaaba lahaa: “aniga ha ila dego”.
2. Dadaalka aan xaddiga lahayn ee ay Saxaabdu Nebiga (SCW) la garabtaagnaayeen.
3. In Nebigu (SCW) uu aad ugu fiir-fiirsan jiray waxyaabaha hareerihiisa ka dhacaya, innagana ay tahay in aynu kaga dayano dhaqankaas qiimaha badan, ee ay ku xidhanyihiin wax badan oo waxtar ahi; waayo mar kasta oo qofku uu u

fiir-fiirsado waxa hareerihiisa ka dhacayaa waa mar kasta oo uu aqoon iyo ogaal u yeesho duruufaha dhabta ah ee ay ku noolyihiin dadka hareerihiisa jooga.

Dhacdada 17-aad

Dhisiddii Dawladdi ugu horraysay

Rasuulku (SCW) marki uu dhammeeyey Masjidki, waxa uu ka dhigay xarunta ugu weyn ee lagu walaalayn karo muslimiintu meel kasta oo ay ka yimaaddaan, si gaar ahna kuwi Madiina joogay. Shaqada uu Masjidka Nebigu (SCW) hayey waxa ka mid ahaa:

1. Ku-oogidda Salaadaha, marka ay Muslimiinta oo dhami saf keli ah istaagaan, waxa Meesha ka baxaya wax kasta oo aan soohdimo iyo teed kala dhexyaallay, maal, magac iyo mansabba, waxaana uu booskaasi noqonayaa meel dadka oo dhami ay simanyihiin, waana xaqiiqadi la rabay in ay dadku fahmaan.
2. Waxa uu ahaa boos dadka Muslimiinta ahi ay diintooda ku bartaan, oo kuwo badan oo hadda jaamicado ka baxay ay ka fahmo iyo aqoon badnaayeen, heer ay aqoontoodi reer galbeedku maanta ku darsaan jaamacadaha ugu tayada fiican, uguna magaca dheer ifkan aynu ku noolnahay inta ay gaaladu gacanta ku hayaan, sida jaamicadda University of Oxford iyo Hartford.
3. Masjidka Rasuulku (SCW) waxa kale oo uu ahaa xarun lagu qaabilo laguna soo dhaweyo wafdiyada iyo safiirrada u imanaya Rasuulka (SCW).
4. Waxa uu ahaa xarun calanka loogu dhiibo ciidamada Mujaahidiinta ahee u baxaya si ay kalmadda Alle ugu sarraysiyyaan si xaq ah, oo aan ahayn xaqdarro ummad aan waxba galabsan la isku qarxinayo, dilayo, dubkana laga saarayo.
5. Waxa uu ahaa xarun lagu soo xidho cidda gaalada laga soo qabto; si uu u dhegaysto qaab-dhaca quruxda badan ee Qura'aanka, ulana socda dhaqanka wanaagsan ee Muslimiinta; si uu isugu beddelo, oo uu u qaato haddii Alle u qoray hanuunka Islaamka, ee ah badbaadada.

6. Waxa uu ahaa Meesha ugu weyn ee ay shacabku ku arkayaan hoggaamiyahooda, isaga oo guryahooda iyo goobahooda shaqaba ugu tagi jiray; si ay u ogaadaan una arkaan dhawaanshaha dhexdooda yaalla.
7. Waxa uu ahaa goob lagaga doodo laguna xalliyo wixi dhib ah ee soo darrida, ha ahaato mid qofeed, mid qoyseed, ama mid qarane.
8. Waxa uu ahaa hoy ay u hoydaan danyarta Muslimiintu, rag iyo haweenba, waxaana magacooda la odhan jiray (Ahlu Sufa), waxaana dadkaas ka mid ahaa Abuu Hurayra, saxaabiga ugu warinta badan Axaadiista Rasuulka (SCW), joogidda Masjidkuna waxa ay ka mid ahayd waxyaabihi ka caawiyey in uu isaga oo mudda yar la joogay rasuulka haddana noqdo qofka ugu warinta badan Axadiisata; waayo shaqo kaleba ma hayn, ee tanaa shaqo u ahayd.²

2

السيّدُ عَبْرِيْهُ بْنُ الْأَثَّى الْمُرْوَةُ وَالْأَخْلَى الْقُرَآنِيَّةُ²
 المُؤْلِفُ : مُحَمَّدٌ مُصطفىٌ بنُ عَبْرِيْهِ الْمُسْلِمِيُّ
 النَّاَشِرُ : رَسَالَةُ دَكْوَرَةِ كَيْفَيَّةِ الْأَجْا - جَامِعَةُ بَيْتِ شَمْسِ الْقَاهِرَةِ
 إِشْبَا : الأَسْنَدُ الدَّكْوُ بِنْهُ الشَّرْقاوِيُّ
 عَمَّ : ١٤٣١ هـ ٢٠١٠ م

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanayno waxa ka mid ah:

1. Kaalinta weyn ee uu Islaamku siiyey walaalaynta dadka, marka laga yimaaddo walaalka/sha ay qofka wada dhasheen waa in uu dareemo dad kale oo ay xadhko kale isugu xidhanyihiin. U fiirso in uu Nebigu (SCW) marki uu Maka yimi waxyaabibi ugu horreeyey ee uu qabtay uu ka mid ahaa walaalaysiinta Muhaajiriin iyo Ansaar.
2. Kaalinta weyn ee uu Masjidku ugu jiro Muslimiinta. Innagana manta laba shaqo oo kali ah baad mooddaa in aynu marka Masjidka la joogo aynu ku qabanno, waa Salaadda iyo casharrarada, ha ahaadaan kuwo kutub la dhigo ah, ama ha ahaadaan kuwo si wacdi ahaan ah loo jeediye.
3. Sida ay gaaladu u necebyihiin Masjidka, oo aanay marnaba in la dhisu u jeclayn, in shaqo Islaamka u danaynnaysa lagu qabtana hadalkeeda iska daa. Xilligi Nebi Muxammad (SCW) ayaanay bilaabantay in Masjidka lala dagaallamo, oo Munaafiqiinti ayaa dhisay Masjid ay ku kala-kaxaynayaan Muslimiinta, waxaana ku soo degay Aayado Qur'aan ah, oo caddaynaya arrintaas.

Dhacdada 18aad

Dastuurki Dawladdi Nebiga

Marka hore erayga (**Dastuur**), macnihiiisu waxa weeye nidaam ay cidi dajisatay; si ay ugu xallisato arrimaheeda u gaark ah. Nebi Muxammadna waxa uu reer Madiina u sameeyey Dastuur qeexaya dhammaan waxa ay dadkaasi iskula dhaqmayaan; maadaama magaalada ay degganyihiiin dad badan oo kala gaddisan, ku kala gaddisan dhanka diinta, qabiillada, duruufta waa in la helaa heshiis ay dadkan isla danta ah galeen oo qoran, kaas oo ay ku xallinayaan arrimahaas ay wadaagaan wixi dhib ah ee ka yimaadda.

Waxa ka mid ahaa waxyaabihi uu Nebigu ku sheegay Dastuurkaas:

1. In ciddi Yuhuudda ka mid ah oo soo raaca Muslimiinta uu yeelanayo gar-gaar dhammaaystiran, il liiditaan ahna aan lagu eegin.
2. In Muslimiinta iyo Yuhuudda la deggan magaalada ay isku leeyihiiin gar-gaar ay wada ilaashadaan magaalada, iyo in ay wixi gardarro ah isaga nasteeexeeyaan si aanay xumaan ku jirin.
3. In qofki la dulmiyo loo gar-garaaro cidda uu doono ha ahaadee.
4. In Jaarku uu nafta oo kale yahay, aanu xaqna u lahayn in la dhibo.
5. In ciddi Magaalada Madiina soo weerarta si siman la isaga wada celiyo.
6. In wixi la isku qabto, ee la isku maan dhaafo, loo celiyo Alle (SWT) iyo Rasuulkiisa (SCW).

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno arrintan Nebigu (SCW) sameeyey waxa weeye:

1. Dastuurka Nebigu cidda uu ummad u aqoonsanaa waxa ay ahaayeen dhammaan umadda **Islaamka**, ee meelna kagamay oollin isaga oo reerki uu ka dhashay oo keli ah u yaqaanna **Ummad**.
2. Saamaynta Dastuur xallinaya arrimaha dadka meeshaas Dastuurka loo dejinayo deggani waxa ay u qaybsantahay laba mid: 1- in shaygaas ay diintu caddaysay, kaasi uma baahna in laga doodo, saxna ma aha, oo Alle iyo Rasuulkiisa ayaaba caddeeyey. 2-In aanay diintu shaygaas sheegin, ee ay u daysay duruufta is-bedbedlaysa ee dadka, taas oo aanay suure ahayn in hal shay inta loo dejijo ay sidaas ahaato, markan waxa la samaynayaa cidda uu qodabkaasi daneeyo oo dadkaas isku danta ah ayaan ka doodaya, isla lafaguraya, kana soo saaraya qodabbo la raaco oo dhex ah, aan cidna dul miyeynin.
3. Sida ay Diintu uga hadashay wax kasta oo qofka aadamaha ahi u baahanyahay waxa ay ku tusinaysaa saxnimada diintan Islaamka, qodabada qaar oo aanay u banbixinna sidaynu hore u sheegnay waa meelaha aanay suuregalka ahayn in ay hal xaalad taagnaadaan, ama ay dadku wadaagaan oo ku xidhan cid walba Meesha ay daggantahay iyo duruuftiida gaarka ah, taas waxa ay diintu u daysay maanka iyo maskaxda ciddaas Meesha isla deggan ee isku duruufta ah.

Dhacdada 19aad

Sharchiyeynti Jihaadka

Marki ay arkeen gaaladi Maka in ay Muslimiintu yeesheen meel u gaar ah, oo ay awood ku leeyihiiin siina faafayaan; maadaama uu Islaamku yahay diin uu Caqliga fayow aqbalayo waxa ay go'aansadeen in ay Muslimiinta go'doomiyaan, oo ay u diidaan dhaq-dhaqaaqa. Inti aanay wax fal ah ku kicin ay xaaladda darseen, waxaanay soo ogaadeen ninka la dhaho Cabdullaahi Binu Ubayya Binu Saluul madaxi Munaafiqiintu in uu karahsanayo Islaamka, oo uu dusha un uga muujiyo in uu Islaam yahay, ee aanu run ahaan u aaminin. Wuxaanay oo u soo direen waraaq ay ugu sheegayaan in ay la dagaallamayaan Muxammad iyo cidda la socota. Marki ay farriintaasi soo gaadhayna waxa uu shiriyey koox, iyaga oo meel hawshi ku falanqaynaya ayaa uu Nebigu (SCW) soo maray, waxaana uu u sheegay dhammaan wixi ay ka sheekaynayeen, marki ay arkeen in qorigodi la qabtay ayey kala yaaceen.

Marki uu Nebigu (SCW) ogaaday sida ay xaaladdu u adagtahay, ee loo go'aansaday in Muslimiinta la laayo, ayuu isagu tuurta u ritay ilaalada magaalada Madiina, Isaga ayaana marka ay cadceeddu dhacdo la wareegi jiray ilaalada magaalada.² Isla xilligaas ay³ xaaladdu adkaatay ayaa uu Alle u ogolaaday Nebiga (SCW) iyo Saxaabada in ay dagaallamaan, oo ay iska dhiciyaan gaaladan sida horarnimada leh u daba dhigtay Muslimiinta, ee raba in la waayo meel ay jaan iyo cidhib dhigeen.

² السیق النبویة والدعوی فی العهـ المدین

لطفـ : أـحـمـ غـلوـشـ

الناـشر : مؤسـسة الرـسـلـ للـطبـاعـةـ وـالـثـبـطـ وـالتـوزـعـ

الـطبـةـ : الـأـوـلـ ١٤٢٤ـ هـ - ٢٠٠٤ـ مـ

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waa:

1. Geesinimada iyo naf-huridda Nebiga (SCW), waxa aad taasna ka arkaysaa Nebiga oo isagu ilaaliye u ah magaalada, naftiisu in ay wax noqotana ka doorbidaya in nafaha Saxaabadu wax noqdaan.
2. In aanay dadka qaar wanaaggu si kasta oo uu bato, si kasta oo uu qofku u wanaagsanaadaana aanay iyaga waxba ka beddelin, waa sida kuwi Nebi Muxammad nasiib u yeeshay in ay la xilli noqdaan, haddana dushana isaga dhigayey in ay rumaysanyihii, dubaaqana aan maalin rumayn.
3. In aanu Islaamku ahayn diin dadka laysa oo qoorta u dheeraysa, marna isku qarxisa, ee uu yahay diin nabad-galyo.

Dhacdaad 20aad

Yuhuuddi Madiina iyo Nebiga (SCW)

Magaalada Madiina gudaheeda waxa Muslimiinta kula noolaa saddex qabiilo oo Yuhuud ah, waxaana ay kala ahaayeen: 1- Banuu Qaynuqaac 2- Banuu Nadiir 3- Banuu Qurayda. Qabiillooyinkaasi waxa ay ahaayeen kuwa ku nool gudaha Madiina, waxa iyaguna jiray qabiillooyin isu tagay oo Yuhuudda ka mid ahaa kuna noolaa waqooyiga magaalada Madiina, si gaar ah meel la odhan jiray **Khaybar**. Haddaba inta aynaan u galin qaabka uu Nebigu ula dhaqmay, bal aynu yara iftiiminno qaabka ay iyagu u noolaayeen. Xilligi Maka ee aan Saxaabodu madiinaba arag, sidoo kalena aanay iman ayaa uu Alle Aayado badan oo Yuhuudda iyo Dawladda Islaamka ee dhalandoonta ka hadlaya soo dajiyey; si maanka iyo maskax-aragga qofka Muslimka ahi u fogaado, oo aanu u noqon mid waxa ay ishiisu qabata un garanaya.

Marki uu Nebigu yimi Madiina waxa uu isku dayey in uu jilciyo qalbiyada Yuhuudda, waana uu soo dhaweeeyey, waxaana uu sameeyey laba arrin:

1. In isaga iyo Muslimiintu ay u qiblystonee oo u jeesteen dhanka Baytul-maqdas, taasina waxa ay iyaga u samaynaysaa macne gaar ah, waxaana ay Nebiga iyo Saxaabodu u jeedaan dhanka Baytul-maqdas 17 bilood.
2. Soomitaanki uu Nebigu soomay maalinka Caashuuraa', oo marki uu Nebigu arkay Yuhuudda oo soomayaan maalinkan ayuu waydiiyey waxa ay u soomayaan, markaasay ku jawaabeen: “maalinkani waa maalin weyn, waa maalinti uu Alle badbaadiyey Nebi Muuse (CS), sidoo kalena uu qarqoomiyey Fircoo iyo duulkiisi. Markaas ayuu Nebigu

ku yidhi: "annaga ayaa idinka mudan Muuse", waana uu soomay, muslimiintana waxa uu amray in ay soomaan.²

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. Sida ay Diinta Islaamku qofka maankiisa iyo maskax-araggiisa u koriso, oo waxa aynu soo aragnay sidi ay Aayadaha Qur'aanka ahi u soo dageen iyada oo Maka la joogo, iyaga oo Aayadahaasi tilmaamaya Yuhuud iyo Dawlad Islaam oo dhalanaysa.
2. Sida quruxda badan ee uu Yuhuudda ula dhaqmay, qalbiyadoodana u soo dhaweeeyey.
3. Sida ay diinta Islaamku uga rabto qofka Muslimka ah in uu rumeyyo dhammaan Rusushi Alle soo diray, iimaakiisuna aanu dhammaystirmayn heer ay wada rumeyaan, halka ay dadka kale ee aan Muslimiinta ahayn, sheegtana in ay aaminsanyihiiin diimaha Samaawiga ah, ee haddana beddelay aanay u aaminsanayn Nebi Muxammad oo haddana ku yaalla kutub ay ku doodaan in ay aaminsanyihiiin.

² المسیح النبیویة

4

المؤلّف : طفـة الحـقـيـقـة طـبـه السـرـجـانـي

Dhacdada 21-aad

Naxariisti Nebiga

Nebigu waxa uu ahay mid u naxariista dhammaan dadka ay xidhiidhka leeyihiin, xidhiidhkaasi ama ha ahado mid dhaw ama mid dheere. Dhacdooyinka jaadkan ahina waa ay badanyihiin, ama ha kula dhaqmo Nebigu dad u dhaw, ama ha kula dhaqmo dad ka dheere. Waxa ka mid ahay:

1. In isaga oo Salaadda ku jira uu maqlay ilma yar oo ooyaya, ka dibna uu Salaaddi gaabiyey; isaga oo la cabsi qaba in hooyadii ay Salaadda ka fitnawdo.
2. In Xasan iyo Xuseen ay yimaaddeen isaga oo khudbadaynaya, oo ay dadka dhex mar-mareen, ka dibna inta uu hadalki joojiyey uu soo qaaday, heer uu meeshi uu joogay keenay.
3. Iyada oo safar lagu jiro, ayaa ay Safiya __mid ka mid ah haweenki Nebiga__ inta uu awrkeedi fadhiistay ay oyday, ka dibna Rasuulki ayaa inta uu socotadi joojiyey ilinta Safiya gacmihiisa ku masaxay.²

5

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdooyinkan waxa ka mid ah:

1. Naxariista Nebiga ee aan xaddiga lahayn.
2. U-dhibirsanaanta Rasuulka (SCW) ee carruurta.
3. Jacaylka baaxadda weyn ee uu Nebigu (SCW) u hayey ooriyihiisa.

² المفطع في سخرية لا إكلا في الدين

جع وإعداد
البالغ في القراءة والسنّة
علي بن فضله الشحود

Dhacdada 22-aad

Ninki reer Miyiga ahay iyo Masjidkii Rasuulka (SCW)

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa nin reer Miyi ahi soo galay Masaajidki Nebiga (SCW), waxaanu ku kaajay dacal ka mid ah Masjidki. Dadki ayaa afka furtay oo ku qayliyey, Rasuulka ayaa se ka qabtay oo yidhi: “daaya, oo marka uu dhammaysto kaadida, waxa aad meeshi uu ku kaajay ku shubtaan wadaan/daraan biyo ah; idinka waxa la idiin soo diray in aad wax fudaydisaan, ee la idiinma soo dirin in aad wax adkaysaan.”²

6

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno Dhacdadanii waxa weeye:

1. Sida ay Saxaabodu uga dhiidhin jireen wixi ay u arkaan in aanay habboonayn.
2. Sida uu Nebigu u ahay mid raxmad badan, heer uu marki ay Saxaabodu ku qayliyeen ninka Masjidka ku kaajaya uu ka qabtay, uma shaagay in ay daayaan inta uu dhammaysanayo kaadida. Wuxaana uu cilmiga caafimaadku sheegay kaadida oo la isku kala jaraa in ay khatar caafimaad ku keenayso qofka.
3. Sida quruxda badan ee uu Nebigu u bar-baarin jiray Saxaabadiisa, oo waa kan ku leh: “idinka waxa la idiin soo diray in aad wax fudaydisaan, ee la idiinma soo dirin in aad wax adkaysaan.”

² Saxiixul Bukhaari (213) ⁶

Dhacdada 23-aad

Nabiga (SCW) iyo Anas Binu Maalik (RC)

Anas Binu Maalik, isaga oo yar ayaa ay hooyadii u keentay Rasuulka (SCW), waxaana ay ku tidhi: “hayso oo adiga ha kuu shaqeyyo.” Sidaas ayaa uu ku ahaa mid ku nool guriga Rasuulka (SCW), waxaana uu yidhi: “waxa aan Rasuulka u shaqeyey 10 sano, waligiina imuu odhan eray aan dhibsado, wax aan sameeyey imuu odhan: “maxaad u samaysay”, wax aanan samaynna imuu odhan: “maxaad u samaynwayday?” Rasuulku waxa uu ahaa ka dadka ugu dhaqanka fiican. Waligay maan taaban maro xariir ah oo ka dabacsan gacanta Rasuulka (SCW)... waligayna maan urin ur ka udgoon dhididka Rasuulka (SCW).”²

7

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadanii waxa weeye:

1. Sida uu ahaa dhaqanka Nebiga ee gaarka ah, marka laga yimaaddo dhaqanka guud ee uu kula dhaqmayo dadka, ee la arkayo, waxa uu **Anas** inoo sheegay sida uu u ahaa gob aanu waligii gunnimo ka arag.
2. Udgoonka baaxadda leh ee uu Rasuulku (SCW) lahaa, heer cadarka/baarafuunka ugu udug uu dhididkiisu ka udgoonaa.
3. Sida uu Rasuulku wax badan indhaha uga laaban jiray, heer aanu qof 10 sano la noolaa hal mar ku odhan: “maxaad sidaa u samaysay iyo maxaad sidaa u samayn wayday” midna.

² الأئمّة في شلّى على المختار

7

تألّف : مجّيي السّنة الحسين من مسعم البغيو ٥٣٢ - ٥٦٥ هـ
حقّه وخرّ أحاديثه ونقّل عليه : العالمة الشّيخ إبراهيم اليقوبي
الناشر : وا الصّيّبة للطباعة والنشر والتوزيع

Dhacdada 24-aad

Yaa iga kaa qabanaya!

Iyada oo laga soo noqday dagaal, ayaa Nebiga iyo Saxaabodu soo gaadheen meel dhir badan, ka dibna waa ay ku nasteen oo qaarba geed bay hoos jiifsadeen, ka dibna nin reer Miyi ah ayaa u yimi Nebigi oo hurda, seeftiisina ay geedka uu hurdo sudhantahay, inta uu seefti galka ka saaray ayuu ku yidhi Nebiga: “yaa iga kaa qabanaya?” Nebiguna isma dhibine waxa uu ku yidhi: “Alle”, in muddo ah marki uu ku cel-celiyey ilaa saddex jeer, Nebiguna uu mar kasta lahaa: “Allaah”, ayaa ay ninki seefti ka dhacday, Nebiga ayaana qaatay, oo ku yidhi: “adiga yaa iga kaa qabanaya?” markaas ayuu ninki yidhi: “mid wax qaada kii ugu wanaagsanaa noqo”.

Nebigu waxa uu u yeedhay Saxaabadi, waxaana uu uga sheekheeyey wixi isaga iyo ninkan dhexmaray, halki ayaanu ku cafiyey, oo iska sii daayey.² 8

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

- 1- Sida weyn ee uu Nebigu Alle ugu xidhnaa, ee isaga oo aan ka fekerin, dhinacna u jeesan u yidhi: “Alle.”
- 2- Geesinnimada Nebiga (SCW).
- 3- Sida uu mar kasta waxa dhacaya u tusi jiray Saxaabada, ee ugu rabbayn jiray raxmadda iyo wanaagga.

² *Saxiixul Bukhaari* ١٢٥ ٨

Dhacdada 25-aad

Qayladi habeenka!

Habeen ayaa ay Saxaabodu cod maqleen, ka dibna waxa ay ka wardooneen codkan baxaya iyo waxa uu yahay, oo dhankiisi ayaa ay qabteen. Iyaga oo aan wali gaadhin meeshi uu codku ka baxayey ayuu Nebigu (SCW) ka hor yimi Saxaabadi, isaga oo ka yimi dhanka codka baxaya, oo saaran Faras uu lahaa **Abuu Dalxa**, oo aan wadan agabkiisi, waxaana uu ku yidhi: “dadyow ha nixina, waa bade”

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno Dacdadanii waaxa weeye:

1. Geesinimada Nebiga (SCW), ee uu iyada oo habeen ah, oo aan cidi wehelin uu u babac dhigayey dhibka ay dadka dhegahoodu maqlayeen.
2. Sida uu Nebigu ugu heellanayaa dadkiisa, ee uu mar kasta ugu war-warayey iyaga.
3. Sida marka ay hawshu timaaddo aan la isugu eegi jirin, ee dadkuba u wada kici jiray, oo iska caawin jiray meel-marinta murugtaa.

Dhacdada 26-aad

Is dejiya waa Safiyee!

Nabiga oo ku ictikaafsan/nag Masjidka ayaa waxa u timi **Safiya Bintu Xuyayyi**, oo ka mid ahayd haweenki Rasuulka (SCW); si ay u soo booqato. Marki ay mudda la yara sheekaysatay, oo ay is-tiri dib u laabo ayuu Rasuulki sii raacay; si uu u sii dhaweyyo. Waxa soo maray laba nin oo Ansaar ahha, waana ay tallaaba dheeereeyeen, Nebiguna maadaama uu ahha qof soojeed badan, waa uu dareemay in ay Nebiga niyada u dhisayaan, oo isku dhaafinayaan, markaas ayuu ku yidhi: “waa Safiya, ee is dejiya”, iyaguna waxa ay dhaheen: “Subxaanallaah” yacnii Alle ayaa xumaan ka dheer, markaas ayuu Nebigu ku yidhi: “Shaydaanku qofka wuxu ka maraa Meesha uu dhiiggu raaco, waxaanan ka baqay in uu qalbigiinna xumaan ku tuuro.”²

9

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadanii waxa weeye:

1. Sida ay Saxaabodu isugu dayayeen oo ay ugu dadaalayeen in aanay dadka ceebahooda baadh-baadhin, xitaa haddiiba ay arkaan wax ceeb ah, oo amma ay naftoodu moodayso, oo qof u gaar ah, dadkana aan dhib ku hayn waxa ay ahaayeen kuwi ka indha-laabta, iskuna daya in ay qofkaas u cudur-daaraan. Arrintaasina waa mid u baahan in il gaar ah lagu eego marka innaga oo Soomaali ah la innaga hadlayo, Sheekheenna weyn ee SH. Mustafe X. Ismaaciil Haaruun, ayaa mar yidhi: “waxa aad mooddaa in dadka qaar loo diray ceebaha dadka kale, oo shaqadoodu tahay in ay cid kale un wax ka sheegaan.” Iskadaa in qofka loo xil qariyee, qodobbo

² Saxyixul Bukhaari (۴۱۸۱)⁹

aanu samayn oo been abuur ah baaba loo samaynayaa, arrintaasina waxa ay leedahay cuqubadeeda, mana sahlana qof aan eed lahayn oo loo sameeyo.

2. Sida uu Nebigu ugu naxariisan jiray haweenkiisa, oo uu isaga oo ictikaafsan inta uu Masjidki ka soo baxo u sii dhawaynayo ooridiisa soo booqatay.
3. Sida uu Nebigu ugu dadaali jiray in uu tuhun saaro dadka, oo aanu Shaydaanka fursad u siin jirirn, waana arrin aad u fiican in uu qofku wax kasta oo qiima dhac ku keenaya ka dheeraado, naftiisana aanu marna uga raalli noqon in la sumcad xumeyyo.

Dhacdada 27-aad

Dagaalki Hogga!

Sidi aynu hore u soo tilmaamnay magaalada Madiina waxa wada daganaa Muslimiin iyo Yuhuud, waxaanu Nebigu (SCW) u sameeyey Dastuur lagu wada noolaanayo, oo sidi aynu soo tibaaxnay ay qodabbadiisa ka mid ahaayeen in magaalada la wada ilaashado. Qodabkan Yuhuuddi magaalada degganayd kamay soo bixin, ee way jabiyeen xeerkaas, markaasna waa laga saaray magaalada.

Muddo sannad ah marki ay magaaladu nadgallyo ku sugnayd ayey arrintaas ah in muslimiintu ay degganaadaan ka xumaadeen, oo ay u tageen gaaladi Carbeed, waaxaana ay ka cadsadeen in ay iska kaashadaan ku duulidda magaalada Madiina, Carabti oo iyaga laftoodu ka xumaa guuldarroyinki ka soo haleeley dagaalki Beder iyo meelo kalena way soo dhaweeyneen fikraddan faquuqidda Muslimiinta ah. Waxa la galay abaabul xooggan oo reerihi aaggaas degganaa lagaga cadsanayo in Muslimiinta dagaal ba'an lagu qaado, qabiillada arrintaas laga cadsanayey qaarna way yeeleen qaarna way diideen.

Ayaamo ka dib waxa magaalada Madiina soo dul fadhiistay ciidan dhan 10,000 (toban kun), oo laga yaabo in Muslimiinta magaalada Madiina ku noolaa oo dhan ay ka badanyihiin, carruur iyo cirroole, nin iyo gabadhba. Madaama uu magaalada joogo hoggaamiye diinta uu sidaa ay tahay diinta ugu badan ee qeexday hannaanka ifka loogu noolaado, hadday dawlad tahay iyo hadday shacab tahayba Nebi Muxammad (SCW), waxa markiba ay sirdoonkiisi soo ogaadeen ciidan magaalada ku soo dhawaaday, oo raba in uu cagta mariyo. Waa hoggaamiye aan taladu baal marine isla markiba waxa uu qabtay kulan aan caadi ahayn shir deg-deg ah, waxaana lagaga dooday habka la isaga difaaci karo ciidankan?

Wax la isla cel-celiyo aragtiyahaba waxa aragti aad u fiican soo jeedihey Saxaabigi qaaliga ahayd mid aan dhulka Carabta laga aqoon, ee ay adeegsan jireen dadki uu ka dhashay ee reer Furus, waxaana ay

ahayd in magaalada hog lagu wareejiyo; waayo Farasku awood uma laha in uu ka soo boodo hoggaas ballaciisa laga fekey, ee lagu saleeyey in ka badan booddadiisa, qofna hadalkiisa daa. Aragtidaas ayaa uu qaatay Nebigu (SCW), 10 Saxaabi oo kastana waxa uu u talosaaray in ay qodaan 40 dhudhun oo ka mid ah hogga, isaguna waa uu ka shaqaynayey oo waxa uu ahaa dadka ugu shaqada adag, meeshi la loodin kari waayo, sida dhagxaantana isaga ayaa loogu yeedhayey oo falliidho kaga sii daynayey.

Saxaabodu aad bay ugu gaajodeen qodidda hoggan, waxaanay u yimaaddeen Rasuulka, oo ay tuseen in caloolahooda ay ku xidheen hal-hal dhagax, isaguna inta uu maradi ka qaaday calooshiisa ay arkeen in uu isagu ka daranyahay oo uu ku xidhanyahay laba dhagax. Maaalinkaas inti hogga la qodayey waxa la arkay wax badan oo ka mid ah mucjisoooyinka Nebiga (SCW), waxaana ka mid ahaa in mid ka mid ah Saxaabada ooridiisu ay qashay neef yar oo adhi ah, qoosh yarna ay doubtay, ka dibna wixi ay kari karaysay ay codsatay in Rasuulka (SCW) iyo saxaabada ka agdhaw wixi uu gaadhi karayo loo geeyo, ka dibna Nebigu Saxaabadi Meesha qodaysay oo dhan waa uu isugu yeedhay, waxaana uu u sheegay in ay hilibkan iyo canjeeladan cunaan, haweenkina waxa uu u sheegay in aanay dabka ka qaadin. Sidi ayaa marba qayb looga soo qaadayey; si Saxaabodu u cunaan, dherigi dabka saarnaana uu dhammaanwaayey, heer ay dhammaan Saxaabodu fulaan oo ay ka dhergaan.

Gaalo oo 10,000 (toban kun) oo ciidan ah, ayaa soo dul istaagtay magaaladi Madiina, iyada oo ay saxaabada dhammeeyeen qodisti hogga. Kuwi laba-wajiilayaasha ahaa (Munaafiqiin) marki ay arkeen tiradan faraha badan ayaa ay quluubtoodi gil-gilatay. Nabiga iyo Saxaabadi oo 3000 (saddex kun) oo keli ah ayaa soo baxay, oo dhabarkooda xigsiiyey buur u dhaw magaalada, halka hogguna uu yahay mid u dhexeeyya iyaga iyo cadawga. Waa kaarto dagaal, iyo god shaxeed oo aanu dagi Karin qof waayo-aragnimo u leh tabaha dagaalka iyo difaaca mooyee qof kale.

Gaaladi marki ay is dhaheen magaalada gala waxa ay arkeen hoggan weyn, ee aan la dhaafi karayn, waxaanay door bideen in

Muslimiinta ay go'doomiyaan, oo in ay meel kale u baxaan u diidaan, halka ay muslimiintina gudagaleen in ay soo leebeeyaa; si aanay ugu soo dhawaan. Kumay joogsan halkaase, waxa ay isku dayeen in ay hoggan ka gudbaan, waxaanay koox iyagi ka mid ahi isku soo qaadeen meel uu hoggu ka yara gaabnaa, waxa se hor istaagay abaalkoodana mariyey muslimiinti Magaaladooda difaacanayey.³

0

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

1. Sida ba'an ee ay Yuhuuddu ballanta uga baxaan.
2. Gaalada iyo qaabka aanay marnaba u jeclayn in ay Muslimiintu hagaagaan oo helaan dawlad iyo daganaansho.
3. In wax walba uu ku hanaqaado qorshaha iyo qaantuunka qaabaynta, oo muslimiintu iyaga oo 3000 ah waxa ay kaga badiyeen 10,000 waxa uu ahaa qorshe, noloshuna waa sidaas, qofka, qoyska iyo qarankuba ma noqon karaan dad naf leh oo ku nool sidi Alle yidhi ee ahayd karaamada iyo milgaha haddaanay tashan.

³ الرَّحْمَنُ الْمَخْتُومُ

0

المؤلف : صفي الرحمن المباركفوري (الميلاد: ١٤٢٧هـ)

الناشر : دار الملا - بيروت (لبنان) طبعة وترجمة والوفا للطباعة والتوزيع

الطبعة الأولى

Dhacdada 28-aad

Rasuulka iyo Shaqada guriga!

Aswad Binu Yasiid ayaa hooyadeen Caa'isha (RC) waxa uu waydiiyey: "Nebigu marka uu guriga joogo muxuu qaban jiray?" markaasay Caa'isha tidhi: "waxa uu qaban jiray waxa ay ehelkiisu guriga ka qabanayaan, marka Salaadda xilligeedi la gaadhana waa uu bixi jiray."³

1

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno arrintani waxa weeye:

1. In uu Nebigu ahaa mid aan is kibrin, ee uu ahaa mid is-dhuldhig badan.
2. In Islaamku aanu oorida farin in loola dhaqmo sidi shaqaale guriga joogta, ee shaqada guriga la wada leeyahay, oo Rasuulki dhammaa ee umaaduba haddii aanu shaqo gaar ah lahayn, ee waxa ay ooriyihiisu qabanayaan ayun buu isna qabanayey.
3. Sida ay diinta Islaamku u qadarisay haweenka, dhibka shaqo ee dabadda iyaga looma dirin, ee waxa loo diray ragga, gurigma waydinkaa arkaya.

³ Saxiixul Bukhaari (5579)

Dhacdada 29-aad

Furashadi Maka

Marki ay gaaladi arkeen guulaha is daba jooga ee ay soo hoynayaan Muslimiintu, ayaa maanka lagu hayey in Maka furashadeedana Muslimiintu maskaxda ku hayaan; si aanay taasi Muslimiinta ugu hirgalin ayey reerihi ku hareeraysnaa Maka go'aansadeen in ay Muslimiinta dagaal ku qaadaan.

Waxa se ay Muslimiintu kedis kaga dhigeen in ay ku soo baxeen, oo ay dul yimaddeen ka hor inti aanay qabiilooyinkani awoodaysan, waana sababta uu Nebigu marki laga yimi dagaalki Xunayn, iyada oo aan inti caadada ahayd la nasan uu Maka ugu soo deg-degay; si uu khatarta soo socota, ee is urursanaysa uga qabto dadka, halkeedana ku istaajiyo dhibkeeda, sidoo kale Quraysh ayaa ka baxday ballanki nabdgalyada ahaa, waxaana ay laysay kuwi taagta darnaa, oo ay xaqoodi dhacday kuwi xoolaha lahaa, oo masuuliyiinta qabiillada dadkoodi la layey oo uu qabiilka **Khusaaca** la dhahaa ugu darnaayeen, ay Nebiga ugu tageen Madiina, iyaga oo u sheegaya in dadkoodi ay Quraysh laysay oo sarab-sarab isu saartay.

Nebigu isaga iska daaye diintan Islaamka ah ee lagu soo dejiyey ayaa ah diin garabsiinaysa qofka dulman, cid kasta oo uu ahaadaba, sidaas aawadeed Nebigu waxa uu si deg-deg ah uga jawaabay dalabka kuwi dulmanaa, waxaana uu diyaargareeyey ciidanki dulmiga Meesha ka saari lahaa, duudsiintana fogayn lahaa. Nabigu waxa uu qaatay go'aan ah in uu dul dago un reer Quraysheed, oo aan haba yaraatee cidi ogaan imaatinkiisa; si aan dhiig u daadan, ee ay is dhiibaan. Waddada ayaa cagta la saaray, oo waxa loo jihaystay dhanka Maka, inti ay waddada kusii jireenna waxa ku soo darsamay qabiillooyin dhawr ah, ilaa la gaadhad u duleedka Maka.

Nebigu waxa uu amar ku bixiyey in qof kastaaba dab shito, oo marka ay arkaan tirada dadka ay is dhiibaan. Habeenki waxa

ay Saxaabodu soo heleen Abu Sufyaan oo magaalada duleedkeedi wax war ah dhega-dhegayanaya, marki waagu baryeyna waa uu islaamay. Subixi waxa ay ciidanka Muslimiintu soo galeen magaaladi Maka, waxaana uu Cabbaas cod dheer ku yidhi: “Quraysheey kani waa Muxammad oo idiinla yimi ciidan aydaan Karin iska caabintiisa, qofki gala guriga Abu Sufyaan waa aamin, qofki gurigiisa soo xidhaana waa aamin, qofka Masjidka galaana waa aamin.”

Nebigu waxa uu Saxaabada siiyey amar uu ku sheegayo hannaanki loo mari lahaa qabsashada magaalada, waxaana ka mid ahaa waxyaabahaas uu amray in aan qofna la dilin, qof hor istaaga oo diida in la galoo mooyee. Marki magaaladi la wada qabsaday ayaa uu Nebigu eegay buurihi uu miciin bidi jiray marka uu dhibka qurayshi ku bato, markaasay ilinti ka daadatay indhihiisa, isaga oo Alle u mahadcelinaya, waa uu socday oo dawaafay, dadkina ay daba qaadeen, isla halkaas ayuu ugu khudbadeeyey isaga oo ku dul akhriyey Aayaddi tilmaamaysay in uu Alle dadka qabiillo ka dhigay; si ay isugu aqoonsadaan, qofka Alle ugu dhawna uu yahay kan ugu cabsashada badan. Halkaas ayuu kula hadlay reer Maka oo ku yidhi: “reer Maka iyo reer Quraysheedow maxaad iga filaysaan in aan idinku samaynayo?” waxaana ay yidhaahdeen: “wanaag baanu kaa filaynaa, waxa aad tahay walaal fiican, oo uu walaal fiicani dhalay” Nebiguna waxa uu ku yidhi: “iska taga, waad fasaxantihiine” Intaa dabadeedna Rasuulku waxa uu galay Kacbada oo ay gudaheeda iyo guudkeedaba yaalleen waraabe-utaagyo (Sanamyo) waxaana uu ku dul akhriyayey Aayaddi tilmaamaysay in xaqi uu yimi, baadilkina uu baaba’ay, isaga oo amray in la bur-buriyo Samayada.³

2

² القو بيله في سيد سيد المرسلين ³

المؤلف : محمد العبد النجاشي (القتو : ١٤١١هـ)

الناشر : والندوة الجديدة بيروت - لبنان

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu ka qaadanayno dhacdadani waxa weeye:

1. In Islaamku uu yahay diin garabsiisa qofka dulman, oo faraysa in loo gar-gaaro waxa uu doono isaga oo aaminsan.
2. Sida uu Islaamku u ilaaliyey dhiigga qofka, gaal iyo Muslimba.
3. Sida ay u badnayd ee baaxadda u lahayd cafinta Nabigu (SCW), waxa aan filayaa in aynaan sawiran karin dareenka ay leedahay in uu qofi isaga oo awood leh qabsado meeshi dhawr iyo tobant sano lagu dhibayey, ee dhiiggiisa dhulka loogu daadiyey, ka dibna isaga oo wata tobant kun oo ciidan ah uu yidhahdo: “iska taga waxba la idiinma haystee” isaga oo waliba marki uu qabsanayeyna aan dhiigooda daadin, sidaasna ciidankiisa amray, ee ku qabsaday in uu ku dhaho: “is dhiiba” keli ah!

Dhacdada 30-aad

Dhimashadi Rasuulka

Rasuulku marki uu ka soo noqday xajki (Wadaac), ayaa uu saddex bilood ka dib darbadooday, waxaana uu markaas joogay guriga ooridiisi iyo hooyadi Muslimiinta ee Maymuun, muddada uu darbadoonayeyna waxa ay ahayd toban casho. Maadaama sida sharcigu sheegayo ninki dhawr xaas leh ay tahay in uu midba habeen u hoydo, Nebigu (SCW) waxa uu ka codsaday haweenkiisi in ay u ogolaadaan in uu ku xanuusto guriga Caa’isha, iyaguna waa ay u ogolaadeen. Nebigu waxa uu dhintay maalin isniin ah oo bisha Rabiicul-awal ay 12 tahay.

Marki ay Nabiga (SCW) naftu ka baxday dadku waa ay saaqmeen, qaar bandanna waa ay u qaadanwaayeen dhimashada Nebiga, waxaana dadkaas ka mid ahaa Cumar Binu Khadaab, oo inta uu dadki hor istaagay yidhi: “qofki dhaha Rasuulki ayaa dhintay qoorta ayaan ka jarayaa”, iyada ay xaaladdi meel adag marayso ayuu Abuu Bakar soo galay, markaasay dadku dhankiisi u jeesteen, ka dibna inta uu hadlay ayuu yidhi: “qofki Muxammad caabudi jirayow Muxaamad wuu dhintay, qofki Alle caabudi jirayowna Alle waa mid nool oo aan waligii dhimanayn” waxaana uu akhriyey Aayaddi Qur'aanka ahayd ee sheegaysay in uu Nebigu yahay mid Rasuul ah, oo hortii ay Rasullo geeriyodeen, ee haddii uu dhinto aanay dadku meeshoodi ku noqon, markaas ayey Saxaabo badan dhaheen: “Aayaddani waabay ka baxday xasuustayada, waxa aad mooddaa in ay hadda soo degtay.”³

3

³ السِّيَرُ النَّبَوِيَّةُ الصَّحِيحَةُ مُحَاوَلَةً لِتَطْبِيقِ قَوَاعِدِ الْمُحَدِّثِينَ فِي تَقْدِيرِ روَايَاتِ السِّيَرَةِ النَّبَوِيَّةِ

المؤلف: د. أكرم ضياء العمري

الناشر: مكتبة العلوم والحكم، المدينة المنورة

الطبعة: السادسة، ١٤١٥ هـ - ١٩٩٤ م

Saddex Cashar

Saddexda Cashar ee aynu dhacdadan ka qaadanaynaa waxa weeye:

1. Sida ay Salaaddu muhiimka u tahay, oo Rasuulku isaga oo darbad aawadeed la liita, uu haddana ka fekerayey Salaadda.
2. Sida ay Saxaabadu Rasuulka u jeclaayeen, heer ay marki uu dintay u rumaysan waayeen qaar badani.

Sida uu Rasuulku u jeclaa Caa’isha, oo xitaa isaga oo liita uu lahaa: “i geeya guriga Caa’isha.”

Tixraac

١ دروس وعبر من صحيح القصص النبوي شحاتة محمد صقر

٢ التوجيهات الإلهية للفرد المسلم من خلال القصص القرآني في سورة القصص، الحامي

الدكتور مسلم اليوسف

٣ اللؤلؤ المكنون في سيرة النبي المؤمن «دراسة محققة للسيرة النبوية»

موسى بن راشد العازمي

الدكتور محمد رواس قلعة جي، الشيخ عثمان الخميس

٤-تاریخ في سیرة الرسول الکریم محمد صلی الله علیه وسلم

٥ - غایة السوّل في سیرة الرسول، عبد الباسط بن خلیل بن شاهین الملطي، ثم القاھري، زین الدین (المتوفی: ٩٢٠ھ).

٦ - الفصول في اختصار سیرة الرسول صلی الله علیه

المصدر: موقع طریق الإسلام الكتاب : السیرة النبویة ٧

٨ السیرة النبویة - دروس وعبر مصطفی بن حسني السباعی (المتوفی: ١٣٨٤ھ)

٩ السیرة النبویة راغب الحنفی راغب السرجانی

١٠ السیرة النبویة كما جاءت في الأحادیث الصحیحة، أبو عمر، محمد بن حمد الصویانی

الناشر: مکتبة العبیکان الطبعة: الأولى، ١٤٢٤ھ - ٢٠٠٤ م

١١ - زنزانة، عادة مدى الحياة د. سلمان العودة.

١٢ السیرة النبویة بین الآثار المررویة والآیات القرآنیة حمد بن مصطفی بن عبد السلام الدبیسی

الناشر: رسالۃ دکتوراة، کلیة الأداب - جامعة عین شمس، القاھرة، إشراف: الأستاذ الدكتور عفت

الشراوی، عام: ١٤٣١ھ - ٢٠١٠ م

١٣ السیرة النبویة والدعوّة في العهد المدینی، أحمد أحمد غلوش

الناشر: مؤسسة الرسالۃ للطباعة والنشر والتوزیع، الطبعة: الأولى ١٤٢٤ھ - ٢٠٠٤

١٤- الأنوار في شمائل النبي المختار

تأليف : محيي السنة الحسين بن مسعود البغوي ٤٣٢ - ٥١٦ هـ

حققه وخرج أحاديثه وعلق عليه : العلامة الشيخ إبراهيم اليعقوبي

الناشر : دار الضياء للطباعة والنشر والتوزيع

١٤- الرحيل المختوم المؤلف: صفي الرحمن المباركفوري (المتوفى: ١٤٢٧ هـ)

الناشر: دار الهلال - بيروت (نفس طبعة وترقيم دار الوفاء للطباعة والنشر والتوزيع)

الطبعة: الأولى

١٥- القول المبين في سيرة سيد المرسلين

المؤلف: محمد الطيب النجار (المتوفى: ١٤١١ هـ)

الناشر: دار الندوة الجديدة بيروت - لبنان

Dhammaad